
# H.C. ANDERSEN


## Sheekaxariir 2005




SOMALI

# H.C. ANDERSEN

# *Sheekaxariir 2005*



RUGKUTUBEEDKA BOQORTOOYADA




Buugga Sheekaxariir ee H.C. Andersen oo loogu talagalay qoysaska soo doolay

waxaa soo saaray
Rugkutubeedka Boqortooyada, diyaarintiisiina waxaa iska kaashaday Sanduuqa HCA 2005, Wasaaradda Qaxootiga, Doolka iyo Qalabixinta, Wasaaradda Waxbarashada, Guddida Rugkutubeedka, Ururka Rugkutubeedka ee Dhenmaarig, Rugkutubeedka Dawladda iyo ka Doolka iyo Rugkutubeedka Boqortooyada.

Tafatirka: Jytte Hilden iyo Claus Olsen

Jaangoynta shaxannada iyo tekiska buugga: Mikkel Sonne

Jeldiga: Claus Seidel

Waxa u tarjumay carabi: Duna Talib Ghali, boosni: Milena Mille Rudez iyo Ljupce Muncanovic, urduu: Nasar Malik, beershi: Fereydun Vahman, soomaali: Ahmed Diria Liban, turki: Adil Erdem iyo dheenish fudud: Kirsten Ahlburg iyo Karl Aage Kirkegaard

Nuskhadda asalka ah ee uu qoray H.C. Andersen iyo xaashiyaha la soo jaray, waxaa dib u soo saaristooda iska leh Rugkutubeedka Boqortooyada

© Rugkutubeedka Boqortooyada, 2005

H.C. ANDERSEN waa dheenish, waana qof tilmaaman. Haddaynu nahay dadka, xoog buu inoo yiqiin. Sidaa darteed baa looga wada jecel yahay dunida oo dhan. 2da abriil 2005 ayey 200 sannadood ka soo wareegaysaa, markuu dhashay.

Rugkutubeedka Boqortooyada, oo kaashanaya Wasaaradda Qalabixinta iyo Rugkutubeedka Doolka iyo xoogag kale oo muhiim ah, ayaa munaasabaddaas ugu dabbaaldegaya buuggan Sheekaxariir oo loogu talagalay dheenishka cusub ee asalkoodii hore ka yimi dalal lagaga hadlo afaf kale.

Lix sheekaxariir oo uu qoray H.C.Andersen ayaa qoysaskaas loogu tarjumay af: carabi, boosni, urduu, beershi, soomaali iyo turki. Fikraddu waxay toos uga dhalatay ruuxda abwaankii qoray sheekaxariirrada.

Dhaqanka dheenishka ee wargelinta dadwaynuhu wuxuu ku salaysan yahay xiisaynta in wax la isu sheego. Sidaas awgeed waxa isagana la soo saaray buug ku qoran af dheenish fudud.

Waxay xoojinaysaa dimuqraadiyadda iyo xoogga xidhiidhiya bulshada, markaynnu aqoon u leenahay soo jireenkeenna.
Kor u akhriska sheekaxariirtu waa cajiib, waana xidhiidh dhaqameed. Ayeeyo dhabta ku haysa ubad ay dhaleen ubadkeedu, ama aabbo xilliga hurdada ku seexinaya ilmihiisa sheekooyin.

H. C. Andersen waa qof la xidhiidha soo jieenkeenna.

*Jytte Hilden* iyo *Claus Olsen*

Jeldiga iyo Hordhaca
*Lorenz Frølich 1820-1908*

Hanis-Hacoo
*Bjørn Wiinblad oo dhashay 1918, Hans Tegner 1853-1932* iyo *Svend Otto S. 1916-1996*

Shinbirbadeedka Yar ee Fooshaxun
*Vilhelm Pedersen 1820-1859, Ib Spang Olsen oo dhashay 1921, Else Hasselriis 1878-1953,*
*Hans Tegner 1853-1932* iyo *Asger Jorn 1914-1973*

Amiiraddii Ku Seexatay Iniinta
*Dorte Karrebæk* oo dhalatay *1946, Hans Tegner 1853-1932 iyo Ib Spang Olsen* oo dhalatay *1921*

Qarafka
*Vilhelm Pedersen 1820-1859, Anni Lippert* oo dhalatay *1928* iyo *Svend Otto S. 1916-1996*

Cirsankayeedhka
*Vilhelm Pedersen 1820-1859, Else Hasselriis 1878-1953, Dina Dam Jensen* 5u *Dugsiga Christianshavn,*
*Ib Spang Olsen* oo dhashay *1921* iyo *Gustav Hjortlund 1901-1977*

Waa Hubaal!
*Mads Stage 1922-2004, Karin Olesen* oo dhashay *1957* iyo *Hans Tegner 1853-1932*

Bogagga Dhexe
*Amiiraddii Ku Seexatay Iniinta, oo H.C. Andersen gacanta ku qoray*
*iyo xaashiyo laga soo jaray waxyaabo uu qoray H. C. Andersen*



Dina Dam Jensen, Dorte Karrebæk, Anni Lippert, Karin Olesen, Ib Spang Olsen iyo Bjørn Wiinblad
si gaar ah ayaa loogu mahadnaqayaa sawirrada ay ugu deeqeen mashruuca

Sidoo kale ayaa loogu mahadnaqayaa Puk Hjortlund, Agnete Stage iyo Kristin Wiborg
oo ku deeqay sawirrada Gustav Hjortlund, Mads Stage iyo Svend Otto S.
Matxafka farshaxnka ee Silkeborg, isagana waxaa loogu mahadnaqayaa oggolaanshaha
dib u daabicista farshaxanka Asger Jorn *Le canard inquiétant* / Shinbirbadeedka yar ee wareersan.

Machadka Suugaanta- iyo Afka dheenishka iyo Gyldendal ayaa loogu mahadnaqayaa oggolaanshahooda
dib u soo saarista qoraalkii asalka ahaa ee sheekaxariirrada H.C. Andersen tan iyo sannadkii 2003.

Fidiyaha qalabka barbaarinta gaarka ah ee Herning iyo Dugsiga Sawirka Tvillingehallen ee
Dawladda Hoose ee Kobanheegan, ayaa loogu mahadnaqayaa talasiintii iyo tusaalooyinkoodii

Waxaa Daabacay: Eks-Skolens Trykkeri Aps oo leh Shahaadadda Deegaanka ISO 14001

Rugkutubeedka Boqortooyada
Søren Kierkegaards Plads 1
1016 København K
www.kb.dk



Hanis-Hacoo ........................................................... 7

Shinbirbadeedka Yar ee Fooshaxun .............................. 13

Amiiraddii ku Seexatay Iniinta .................................... 27

Qarafka ........................................................................ 31

Cirsankayeedhka ........................................................... 45

Waa Hubaal! ................................................................. 61



# Hanis-Hacoo

Beer da' wayn baa ku tiil meel ka baxsan magaalada. Beerta waxaa lahaa, degenaana dhexdeeda, oday gaboobay oo dhalay laba wiil oo aftahanno ah. Wiilashu waxay rabeen inay doonaan inanta boqorka. Arrintaasna waxay ku dhiirradeen, ka dib markay baahisay inay guursan doonto ninkay u aragto inuu ugu aftahansan yahay ragga soo doona.

Muddo siddeed cisho ah ayey labada wiil isu diyaarinayeen arrintaas, taasoo ahayd inta ugu badan ay haysteen, hase yeeshee way ku filnayd, waayo markooda hore ayey lahaayeen aqoon hore oo ballaadhan, waxtarna way ahaayeen. Midkood wuxuu dusha ka qaybsanaa dhammaan qaamuus aqooneedka laatiinka ah, iyo giddi wargaysyadii magaalada ka soo baxay saddexdii sannadood ee ugu danbeeyey, isagoo hor iyo gadaal, gees walba ka dareerin karayey. Wiilka kalena wuxuu yiqiin giddi qodobada xeerka iyo wax kastoo ay ahayd inuu ogaado waxgaradku. Siduu filayeyna, wuxuu ka hadli karayey dhammaan arrimaha la xidhiidha dawladda. Waxaa kaloo intaas u dheeraa daabaca xisaamada saraawiisha, isagoo ahaa xariif ku wanaagsan farsamada gacanta.

»Waan ku guulaysanayaa inanta boqorka!« ayey labaduba yidhaahdeen. Aabbahoodna mid walba wuxuu siiyey faras. Kii korka ka hayey qaamuus-aqooneedka iyo wargaysyadu wuxuu helay faras caynab ah. Kii yiqiin xeerarka iyo daabacuna wuxuu helay faras baroor ah. Dabadeed bishimaha ayey ku subkadeen saliid beer kalluun, si ay debnahoodu u liilaan. Dhammaan shaqaalihii beerta

ayaa goobta isugu soo baxay, si ay u daawadaan goortay fardaha fuulayaan. Islamarkaas ayuuna yimi walaalkoodii saddexaad. Dhab ahaan walaaluhu waxay ahaayeen saddex, hase yeeshee kan cidi ma tirin jirin. Waayo sida labada kale ma lahayn aqoon, waxaana loogu yeedhi jiray Hanis Hacoo.

»Halkaad tegaysaan, ee aad u lebbisateen dharkii munaasabadaha?« ayuu waydiiyey.

»Qasriga boqorka ayaannu tegaynaa, si aannu amiiradda u doono!« ayey ku yidhaahdeen, »miyaanad maqlin warka durbaanlayda boqorku gaadhsiisay dalkoo dhan!« Markaasay u sheegeen.

»Waa arrin fiican, ee haddaa aniguna aan idin raaco!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo. Walaalihiina intay ku qosleen ayey fardahoodii dhaqaajiyeen.

»Aabbo, anigana faras i sii!« ayuu kor ugu qayliyey Hanis-Hacoo, » hawo guur ayaa qudhayda i haysa e. Hadday i yeesho, i yeeshay. Hadday i yeeli waydana, waan soo dhabar garaacayaa!«

»Waxaasi waa hadaltiro!« ayuu yidhi aabbihii, »adiga waxba faras ku siin maayo, oo ma hadli taqaanid! Ragga ishu haysaa, waa walaalahaa!«

»Haddaan faras waayo!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, »markaa orgigayga ayaan kaxaysan. Isagaan iska leeyahay. Si fiicanna wuu ii qaadi karayaa!  Dabadeed dhabarka ayuu uga baxay orgigiisii, markaasuu cidhbaha kaga dhuftay dhinacyada oo cagta saaray jidkii magaalada. Orgac! Waa sidee. »Waan soo socdaa!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, markaasuu hees kaga dayaamiyey.

Hase yeeshee walaalihii si aad u deggan ayey u hor socdeen, iyagoon

eray ka soo baxayn afkooda. Waayo waxay diyaarinayeen murti hufan ay golaha geeyaan, taasoo hadda ay sii gorfaynayeen.

»Waar Hooy!« ayuu ku qayliyey Hanis-Hacoo, »waan soo socdaa! Bal eega waxaan jidka ka soo helay!« dabadeed wuxuu tusay tuke bakhtiyey.

»Hacoo!« ayey ku yidhaahdeen, »maxaad ku falaysaa waxan?«

»Waxaan hadyad u siinayaa inanta boqorka!«

»Waad tahay ee sidaas yeel!« ayey ku yidhaahdeen, oo intay ku qosleen ayey cagta maaleen.

»Waar Hooy!« ayuu haddana ku qayliyey Hanis-Hacoo, »waan soo socdaa! Bal eega waxan hadda soo helay, waa wax aan maalin kasta laga helin jidka!«

Walaalihii baa haddana soo jeestay si ay u arkaan wuxu helay.



»Hacoo!« ayey ku yidhaahdeen, »waa qaraafiico duugoobay oo sartii sare ka hoolantay! Ma inanta boqorka ayaad waxanna u waddaa?«

»Haa, iyadaan siinayaa!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo; Walaalihiina intay ku qosleen, ayey fardahoodii dhaqaajiyeen oo in badan ka goosteen.

»Waar Hooy! Haddana waa i kan« ayuu ku qayliyey Hanis-Hacoo, »oof! Hadda waxaan helay baa ka sii wacan oo ka sii wanaagsan! Kan wax u dhigmaaba ma jiraan!«

»Maxaad imminkana heshay?« ayey yidhaahdeen walaalihii.

»Waw« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, »Maaha wax laga sheekayn karo! Maxay ku farxi doontaa inanta boqorku!«

»Uf!« ayey yidhaahdeen walaalihii, »waa dhiiqo uraysa oo bullaacadeed!«

»Haa, waa sidaas!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, »waa noocii ugu wacnaa, lamase guri karo oo faraha ayey ka siibanaysaa!« dabadeed wuxuu ka buuxsaday jeebka.

Hase yeeshee walaalihii, intii tamartooda iyo itaalkoodu ahaa ayey eryeen fardahoodii si ay uga libdhaan. Dabadeed saacad ka hor ayey gaadheen irriddii magaalada. Ninkii halkaas yimaadda, ee doonaya inanta boqorkana waxaa la siinayey lambar u xidhiidhasan siday u kala hor yimaadeen. Lix kastana waxaa loo safay qaab cidhiidhi ah oo aanay gacmaha dhaqaajin karin. Sidaasina way wacnayd. Waayo haddii kale, kan ayaa keer dhaafay awgeed, ayey dhabarka is wada hoodhin lahaayeen.

Dhammaan dadkii kale ee magaaladuna, qasriga ayey hareero tubnaayeen. Daaqadaha ayeyna toos uga daawanayeen, sida inanta boqorku u qaabilaysay raggii soo doonay. Iyadoo marku fadhiga soo galo mid agnaan ahi, amar ku bixinaysay: »Mari maayo! ee debedda u saara!«

Haddaba imminka waxaa soo galay walaalaha kii qaybsanaa qaamuus-aqooneedka, oo intuu safka taagnaa giddi wada illaaway. Dhulku marayey baa jiiqleeyey, siligguna wuxuu ahaa muraayad oo wuxuu is arkay isagoo madaxa u foorara. Daaqad kasta waxaa taagnaa saddex karraani iyo duq xeerbeegti ah. Mid waliba wuxuu qorayey wax kastoo la yidhaahdo, si ay toos wargayska ugu soo baxaan,

dabadeed magaalada dacalleeda loogaga iibiyo laba shilin. Waxay ahayd goob cabsi badan, markaasaa haddana lagu sii shiday shoolad dhuumaheedii dhamacoobeen.

»Meeshu aad ayey u kulushahay!« ayuu yidhi wiilkii guurdoonka ahaa.

»Haa, waayo aabbahay baa maanta shiilaya diigag dhaylo ah!« ayey tidhi inantii boqorku.

»Een!« ayuu ku mergeday. Muu filayn hadalkan. Eray qudh ah ayuu ka soo qaban waayey, murtidu rabay inuu golaha keeno. Een!

»Mari maayo!« ayey tidhi inantii boqorku, »ee debedda u saara!« Markaasay noqotay inuu baxo. Dabadeed waxaa soo galay walaalkiisii kale.

»Meeshu si daran ayey u kulushahay!« ayuu yidhi.

»Haa, diigag dhaylo ah ayaannu maanta shiilaynaa« ayey tidhi inantii boqorku.

»Maxaad ti-maxay?« ayuu yidhi, qorayaashii oo dhammina waxay qoreen Maxaad ti-maxay?

»Mari maayo!« ayey tidhi inantii boqorku, »ee debedda u saara!« Hadda waxaa fadhigii qasriga soo galay Hanis-Hacoo oo weli fuushan orgigii. »Meesha maxaa naaro ka dhacaya!« ayuu yidhi.

»Waa sidaas, waayo diigag dhaylo ah ayaan maanta shiilayaa« ayey tidhi inantii boqorku.

»Waa arrin fiican« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, »haddaa aniguna malaha waan shiilan karaa tuke?«

»Waad shiilan kartaa!« ayey tidhi inantii boqorku, »ee ma helaysaa weel aad ku shiisho, waayo anigu digsi iyo daawe midna ma hayo!«

»Waan hayaa weel!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo. »kaniba waa digsi leh

dhego jaandi ah!« Dabadeed wuxuu soo saaray qaraafiicihii idlaaday, markaasuu badhtanka u dhigay tukihii.

»Waa cunto dhan oo hal xilli ku filan« ayey tidhi inantii boqorku, »ee halkee ayeynu uga keennaa suugo!«

»Taas jeebka ayaan ku sidaa!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo. »wax badan oo aan ku dari karo ayaan hayaa!« dabadeed wuxuu ku daray in yar oo dhiiqadii jeebka ugu jirtay ah.

»Sidaasaan rabaa!« ayey tidhi inantii boqorku, »wax kasta jawaab baad u haysaa! Waxaad tahay aftahan oo adiga ayaan ku dooranayaa! Hase yeeshee ma og tahay in la qorayo eray kastoo aynu nidhaahno ama nidhi, berritana lagu soo saarayo wargayska! Waxaad aragtaa, inay daaqad kasta joogaan saddex karraani iyo duq xeerbeegti ah. Ka ugu darani waa duqa xeerbeegtida ah. Waayo, isaga waxba ma galaan!« Inay cabsi geliso, ayey sidaas u tidhi. Giddi karraaniyaashiina farxad ayey dananeen, oo dhibco khad ah ayey dhulka ku qubeen.

»Muran kuma jiro mudnaantooda!« ayuu yidhi Hanis-Hacoo, »ee waxa ugu fiican aan siiyo duqa xeerbeegtida ah!« Dabadeed dhiiqadii jeebka ugu jirtay buu wejiga kaga saydhay.

»Si fiican baad u gashay!« ayey tidhi inantii boqorku, »anigu sidaas ma yeeli kari lahayn! Hase yeeshee waa inaan barto!«

Dabadeedna Hanis-Hacoo wuxuu noqday boqor, wuxuu yeeshay oori iyo taash, carshina wuu ku fadhiistay. Sheekadani waxay toos nooga soo gaadhay wargayskii duqa xeerbeegtida ah - in lagu kalsoonaadana maaha.

# Shinbirbadeedka yar ee fooshaxun

Waxay ahayd xilli xagaa ah, oo magaalada debeddeedu aad u qurux badnayd. Beeraha qamadidu dahabi ayey ahaayeen, kuwa heedduna cagaar. Xidhmooyin caws ah ayaa lagu tuulay dhinaca hoose ee faagagga cagaaran. Halkaasna waxaa marayey xuur ku laafyoonayey lugihiisii dhaadheeraa ee cascasaa, kuna hadlayey af masri uu ka bartay hooyadii. Beeraha iyo faagagga cagaaran waxaa ku wareegsanaa kayn ballaadhan. Kaynta badhtankeeda waxaa ku yiil balliyo gun fog. Sidaas ayey magaalada debeddeedu xoog ugu qurux badnayd. Barta iftiinka cadceeddu qummati u hayo, waxaa ku yiil beer da' wayn oo gacan biyeysani ku xeernaa. Derbiga beerta iyo gacanka biyeysanna waxaa u dhexeeyey geedo dhaadheer oo balanbaal ah. Kuwa ugu dhaadheerna waxaa hoos joogsan karayey carruur yaryar. Goobtaasi, sida kaynta ballaadhan, ayey ahayd cidla'. Waxana ku noolayd shinbirbadeed, buul hoostii ku fadhiday ukun ay filaysay inay mar hore dillaacaan. Hase yeeshee waxay qaateen muddo dheer, oo hadda quus ayey qarka u saarnayd, dhif baana cidi soo booqataa. Shinbirbadeedda kale, inay gacanka ku dabbaashaan ayey xoog uga jeclaayeen inay kor u baxaan oo hoos fadhiistaan balanbaalka, si ay iyada u xantaan.

Ugu danbaystii, hal-hal ayey ukuntii u dillaacday: »Bac! Bac!« Hurdiga iyo xabkii ku dhex jirayna wuxuu wada noqday noole, madaxa kor u la soo baxay.

»Waq, waq!« ayey tidhi hooyadii. Idilkoodna intii itaalkoodu ahaa ayey waqwaqleeyeen. Iyagoo hoos jooga caleemihii cagaarnaa, ayey



gees walba eegeen. Hooyadu way u oggolayd, inay halkay rabaanba eegaan. Waayo midabka cagaaran baa indhaha u roonaa.

»Dunidu baaxad waynaayey!« ayey wada yidhaahdeen. Waayo halkay hadda joogeen, xoog ayey uga duwanayd halkay ka soo baxeen - ama ukunta dhexdeedii.

»Ma intan uun baad dunida u malayseen!« ayey tidhi hooyadii, »dunidu waxay taxan tahay min beerta dacalkeeda kale iyo ilaa beerta wadaadka! Hase yeeshee halkaas weligay ma gaadhin! Idinku halkan, hadda ma ku dhan tihiin!« ayey waydiisay oo sare kacday, »maya, kuma dhammidin! Weli ukuntii ugu waynayd ma dillaacin. Tolow muddo intee le'eg ayey qaadan doontaa! Waan ka xumahay!« ayey is tidhi, oo haddana dib ugu fadhiisatay.

Waxaa booqasho ugu timi shinbirbadeed gabawday, oo waydiisay: »Waa sidee xaalkaagu?«

»Ukuntii, mid baan dillaacin oo qaadatay muddo aad u dheer!« ayey tidhi shinbirbadeeddii ku fadhiday ukuntu, »Meel yarna weli kamay dalooshamin, hase yeeshee waad u jeeddaa intii kale! Weligay ma arkin dar ka qurux badan! Giddigood waxay u eg yihiin aabbahood, inkastoo habaarqabe aanu marna i soo booqan.«

»Bal ka baydh, aan eego ukunta dillaaci waydaye,« ayey tidhi shinbirbadeeddii gabawday, »waxaa laga yaabaa, inay tahay ukun digirin! Aniga mar ayey hore ii kadeeday taas oo kale. Werwer iyo dhibaato ayaan kala kulmay, waayo digirinku way ka baqaan biyaha! Waan u waqwaqleeyey oo dudduucay, hase yeeshee waxba u may tarin! Aan eego ukuntaas! Waa sidaan sheegay, oo waa ukun digirin! Ha iska taallo ee iskaga tag, oo ilmaha kale soo dabbaalbar!«

»Maya, muddo yar oo kale ayaan ku sii fadhiyayaa!« ayey tidhi shinbirbadeeddii, »intii badnayd haatan waan ku soo fadhiyay, oo waan la gudhinayaa!«

»Sida kula habboon yeel!« ayey tidhi shinbirbadeeddii gabawday, dabadeed way tagtay.

Mar danbe ayey dillaacday ukuntii waynayd: »Bac! Bac!« waxaa ka soo baxay ilmo yar oo xoog u buuran oo foolxun. Shinbirbadeeddii baa eegtay: »Waa ilmo si xun u buuran« ayey tidhi; »inta kale midkoodna sidan maaha! Marna suuragal maaha in digirin dhalay! Wuxuu yahayba dhawaan baan hubsan! Waa inuu biyaha dhex gelo, taan aniga laftaydu ku riixana!«

Dharaartii danbe hawadu way fiicnayd, qorraxduna way wada haysay caleemihii cagaarnaa ee balanbaalka. Shinbirbadeeddii iyo yaryarkeediina, waxay u wada kaceen dhinicii gacanka: Batalaq! Hooyadii baa ku boodday biyihii oo tidhi: »Waq! Waq!« Markaasay yaryarkiina, mid mid uga soo daba galeen. Way quuseen oo madaxa hoos mariyeen biyaha. Haddana markiiba kor ayey u soo baxeen, oo si wacan u sabbeeyeen, lugahoodiina toos ayey u hawlgaleen. Giddigood way galeen biyaha, xataa kii yaraa ee fooshaxumaa, ee lahaa midabka dameeriga ah, qudhiisu wuu dabbaashay.

»Maaha digirin!« ayey tidhi, »bal eeg sida fiican uu lugaha uga shaqaysiinayo, iyo sidu u qumman yahay! Waa ilmahaygii aan biyo is marin! Salka iyo lafta ayuu ka qurxoon yahay, marka saani loogu fiirsado! Waq! Waq! - Ina keena, aan dunida idin soo tuso, oo idin soo baro beerta shinbirbadeedda e. Marwalbase dhinacayga ku nabnaada, si aan la idinku joogsan, iskana jira bisadda!«

Dabadeed waxay yimaaddeen beertii shinbirbadeedda, oo sawaxan xumi ka oognaa. Waayo laba qoys baa isku dilayey masbadeed madaxii, markii danbese bisad baa qaadatay.

»Ma u jeeddaan? Waa sidaas dunidu!« ayey tidhi hooyadii, way miliqsatay, waayo qudheedu waxay rabtay inay cunto madaxa masbadeedka. »Cagaha fudaydiya« ayey tidhi, »tijaabiya inaad waqwaqlayn kartaan, markaad la gudboon tihiin shinbirbadeeddaas gabawdayna, madaxa hoos u yar dhiga! Way ugu gobsan tahay inta meesha joogta, oo Isbaanish ayey dhiig ku leedahay! Sababtaas ayeyna xoog ugu shilis tahay. Ma u jeeddaan harqadda cas ee ku xidhan lugteeda? Waa sumad qaali ah, oo tilmaamaysa heerka ugu sarreeya ee loo daneeyo shinbirbadeed. Waxay muujinaysaa in dad iyo duunyaba la wada garto, oo aanay lumin! - Waqwaqleeya! - ha buquflaynina! Shinbirbadeedda saani u rabbaysani cagaha way kala durkisaa, sida aabbaheed iyo hoooyadeed, bal eega sidan! Hadda hoos u roga madaxa oo waqwaqleeya!«

Sidii ayey yeeleen, hase yeeshee shinbirbadeeddii kale ee hareerahooda ayaa aragtay oo kor ugu wada dhawaaqay: »Hayaay! Haddana koox kale ayaa innagu soo biirtay, siday meeli innaga bannaan tahay! Uf, siduu kaasi u eg yahay! Isaga maba xammili karno« - dabadeed mid baa toos ugu boodday oo qoorta ka qaniintay.

»Nabadgeli!« ayey tidhi hooyadii, »illayn waxba muu samayne!«

»Waa run, hayeeshee wuu buuran yahay, waana waageeni« ayey tidhi shinbirbadeeddii qaniintay, »sidaa darteed waa in la weeteeyo!«

»Hooyadani, dhal qurux badan ayey wadataa!« ayey tidhi shinbirbadeeddii gabawday ee marada cas lugta ku xidhnayd, »giddi

way qurux badan yihiin mid mooyaane. Isagu maaha dhammays. Wacnaan lahaydee, iyadoo markale dib ugu fadhiisata oo soo dillaacisa!«

»Sidaasi ma dhacayso, Marwadii mudnayday!« ayey tidhi hooyadii, »waa run oo ma qurux badna, hase yeeshee wuu dabeecad fiican yahay. Si wacan ayuuna, sida kuwa kale, ugu dabbaalan karaa, haddaanu kaba sii fiicnayn! Waxaan filayaa in quruxdiisu soo bixi doonto marku koro, ama waqti dabadeed uu noqon doono mid yar oo caadi ah! Muddo badan buu ukunta dhex jiifay, oo weli waa caydi!« intay luqunta qabatay ayey baalasha u dhiibisay, »weliba waa lab,« ayey tidhi, »oo wax badan waxaasi yeeli maayaan! Waxaan rajaynayaa inuu xoog waynaado oo isku fillaan doono!«

»Dhasha kale way fiican yihiin!« ayey tidhi shinbirbadeeddii gabawday, »gurigu waa gurigiinnii, haddaad masbadeed soo heshaanna, waa  ila soo mari kartaan!«

Markaasay dareemeen, inay gurigoodii joogaan.

Hase yeeshee shinbirbadeedkii yaraa ee miskiinka ahaa, ee dillaacay markii ugu danbaysay, fooshana xumaa, waa la qaniinay oo la daafadeeyey oo laga tuntay. Loomana kala hadhin shinbirbadeed iyo digaag. »Wuu buuran yahay!« ayey gidi wada yidhaahdeen. Digirinkii qonofka wayn uu ku dhashay awgeed, isugu maleeyey imbiraadoorkuna, intu baalashiisii u kala bixiyey sidii doonni shiraaqlay shaaximan, ayuu toos u abbaaray oo rudhay, ilaa madaxii dhiig noqday. Shinbirbadeedkii yaraa ee miskiinka ahaa, wuu garan waayey meel uu cag dhigo. Xoogna wuu u wareeray, waayo aad buu u foolxumaa, cid kastoo beerta joogtayna way caayeysay.


Waxaas ayaa ku dhacay dharaartii kowaad, intii danbena dharaar kasta way ka sii daraysay. Cid waliba way caydhsatay shinbirbadeedkii yaraa ee miskiinka ahaa. Xataa walaalihii baa ugu xumaa oo cagagsaday, giddigood waxay ku yidhaahdeen: »May bisadi ku qaadato, faqatiir yahaw!« Hooyadiina waxay tidhi: »Mar uun maad iga qarsoontid!« markaasay shinbirbadeeddii qaniintay, oo digaaggii rifeen, oo inantii cuntada siin jirtay shinbiruhuna laad ku kicisay.

Markaasuu cararay oo xaggii dayrka xerada u duulay. Waxaa ka diday dhammaan shinbirihii yaryaraa ee dhirta saarnaana. »Foolxumadayda ayey ka yaaceen« ayuu is yidhi oo indhaha isku qabtay, hase yeeshee haddana markiiba cagaha ayuu wax ka dayey, oo firdhaday, ilaa uu ku soo baxay haro ballaadhan oo ay ku nool yihiin shinbirbadeed duurjoog ah. Halkaas ayuu jiifsaday oo giddi habeenkii hurday. Xoog buu u daallanaa, wuuna murugaysnaa.

Subaxnimadii ayey shinbirbadeeddii duurjoogta ahayd kor u soo duushay, waxay arkeen saaxiibka cusub ee ku soo biiray. »Maxaad tahay?« ayey waydiiyeen. Shinbirbadeedkii yaraa baa hadba gees u jeestay, una bariidiyey sidii ugu fiicnayd uu karayey.

»Aad baad u foolxun tahay« ayey ku yidhaahdeen shinbirbadeeddii duurjoogta ahayd, »hase yeeshee dan kaama lihin kol haddaanad naga guursanayn« Miskiinow ba'! Guur haabka kuma hayn, waxaa u darnayd keliya inay u oggolaadaan jiifsiga doogga, iyo biyo yar uu ka cabbo harada.

Marku laba maalmood jiifay, ayey u yimaadeen laba juglay, oo lab oo goor dhawayd dillaacay, sidaas awgeedna xoog ugu firfircooni. Waxay ahaayeen duurjoog.



»Maqal saaxiib!« ayey ku yidhaahdeen, »xoog baad u foolxun tahay, oo waannu kaa helnay! Maad na raaci, oo maad noqon shinbir dool ah! Waxaa halkan ka dhow haro kale oo ay ku nool yihiin juglay qurux badan, oo duurjoog ah. Giddi waa dheddig, way waqwaqlayn karaan! Waxana suuragal ah inaad calafkaaga ka hesho, si kastaad u foolxun tahay!«

»Bul! Bul!« ayuu ka maqlay dushiisa, labadii juglay oo dhintayna, waxay ku dul dhaceen dooggii, biyihiina dhiig cas ayey noqdeen. »Bul! Bul!« ayuu haddana maqlay, giddi juglaydii duurjoogta ahaydna way wada duuleen, oo haddana la toogtay. Olole ugaadhsi oo ballaadhan ayuu ahaa. Ugaadhsataduna waxay ku xeernaayeen harada. Qaarkood

baa ku dul taagnaa laamaha u soo baxay dhinaca biyaha. Qiiq buluug ah ayaa hadhkii dhirta, sida daruuraha uga dhex kacay, oo biyihii dul heehaabay. Eydii ugaadhsatada ayaa timi dhoobadii, oo biyo batalaqsaday. Dooggii iyo aalihii baa dhan walba u ciiray. Shinbirbadeedkii yaraa ee nasiibka xumaana wuu argagaxay, oo madaxa hoos u foorariyey si uu baalasha ugu dhuunto. Waxase markiiba soo dhinac joogsaday ey wayn oo baqdin leh. Carrabka ayuu laalaadinayey, indhihiisana dhinbiilo shareed baa ka duulayey. Intu dalqada kala waaxay buu dul hadheeyay shinbirbadeedkii yaraa, oo wada muujiyey ilkihiisii fiiqnaa. Hase yeeshee, isagoon taaban buu haddana iskaga tegay oo biyihii dhex batalaqsaday.

»Eebbow waa kugu mahad!« ayuu yidhi shinbirbadeedkii yaraa, isagoo neeftuuraya, »heerka foolxumadaydu gaadhay, xataa eydii baan rabin cuniddayda!«markaasuu bartii beerka dhigay, intii xabaddu socotay. Rasaastuna darandoorri ayey u dhacaysay.

Muddo dheer dabadeed ayey soo noqotay xasilloonidii. Hase yeeshee miskiinkii yaraa weli kuma dhiirran inuu istaago, oo saacado kale ayuu sii sugay. Goor danbe ayuu hareeraha eegay, oo intii awooddiisu ahayd cararay, si uu harada dhakhso ugaga baxo. Wuxuu ka gudbay beerihii iyo faagaggii. Dabayl baa ka hor timi, markaasay ku adkaatay inuu meel fog gaadho.

Cawayskii buu soo gaadhay dergad beeralay yar oo busaaradi ka muuqato. Waxay ahayd kharaabad garan la’ dhinacay u dhacdo, una taagnayd sababtaas uun. Dabadeed dabayshii baa gilgishay shinbirbadeedkii yaraa, markaasuu dabada dhidbaday si aanay u qaadin. Haddana way soo korodhay oo ka sii dartay. Markaasuu

ogaaday in albaabka dergaddu dhinac u janjeedho oo hingis ka baxay, barta bannaanna uu ka dusi karo, hadduu isku cidhiidhyo. Dabadeed sidii buu yeelay.

Dergadda waxaa ku noolayd islaan gabawday oo lahayd curri iyo digaagad. Curriga, oo ay ugu yeedhi jirtay Shoodhe, wuxuu yiqiin sida loo reemo, tuur iyo giirna wuu iska kicin jiry. Markaasaa dib loogu salaaxi jiray dhogorta. Digaagaddu waxay lahayd lugo aad u gaagaaban, oo waxaa la odhan jiray cagayar. Waxay ahayd digaagad si fiican u dhasha. Islaantuna, sidii ilmo ay dihatay ayey u jeclayd.

Subaxnimadii ayaa markiiba la ogaaday shinbirbadeedkii yaraa ee waageeniga ahaa, markaasuu currigii reemay, digaagadiina quqlaysay.

»Waa maxay?« ayey tidhi islaantii, intay dhinacyada eegtay. Hase yeeshee waxba saani u may arkayn, oo ilmihii yaraa ayey moodday shinbirbadeed shilis oo soo luntay. »waa calaf afka iiga soo galay« ayey tidhi, »haddaan heli karaa ukun shinbirbadeed, haddaanu ahayn neef lab! Bal waynu eegi doonnaa!«

Dabadeed saddex wiig baa la dhawrayey shinbirbadeedkii yaraa, hase yeeshee waxba ukun ma dhalin. Currigu wuxuu guriga ka ahaa Oday-biiqe, digaagaduna Arraweelo. Had iyo goorna waxay odhan jireen: »innaga iyo dunida« waayo waxay rumaysnaayeen, inay iyagu badh yihiin, oo weliba badhka fiican yihiin. Shinbirbadeedka yarise wuxuu qabay, in si kale wax loo arki karo. Hase yeeshee digaagaddu ma garawsan jirin waxaas.

»Ma dhali kartaa ukun?« ayey waydiisay.

»Maya!«

»Haddaba afka isku qabo!«

Currigiina wuxuu ku yidhi: »ma reemi kartaa? Tuur iyo giir, midna ma iska kicin kartaa?«

»Maya!«

»Haddaba ha soo dhex gelin, marka waxgaradku wada hadlayaan!«

Shinbirbadeedkii yaraa, isagoo niyad xun buu doc fadhiistay. Markaasuu xusuustay neecawdii debedda iyo fallaadhihii cadceedda. Inuu biyo dul sabbeeyo, ayuu si daran u xiiseeyey. Wuu hayn kari waayey xiisihiisii, markaasuu u sheegay digaagaddii.

»Maxaa kugu dhacay?« ayey waydiisay, »Ma shaqo la'aan baa kugu dhacday, oo waad wahantay! Ukun dhal ama reen, waxani way kaa tegi e.«

»Wayse fiican tahay in biyaha la dul sabbeeyo!« ayuu yidhi shinbirbadeedkii yaraa,« in ilaa gunta la quusana, aad ayey u xiiso badan tahay!«

»Haye', aad ayey u xiiso badan tahay!« ayey tidhi digaagaddii, »dhab baad u waalatay! Curriga ayaa intan garanayo ugu xariifsan, ee bal waydii inuu ka helo dul sabbaynta ama quusidda biyaha! Anigu waxba ku darsan maayo. Bal hadda warayso islaanta wayn ee guriga leh, anigu qof ka caqli badan ifka kuma ogi e ! Ma filaysaa inay jeceshahay inay dul sabbayso ama quusto biyaha!«

»Idinku ima fahmaysaan aniga!« ayuu yidhi shinbirbadeedkii yaraa.

»Waa tahay, annagu haddaannu ku fahmi wayno, ma jirtaa cid kaloo ku fahmaysaa! Bal aniga iska kay illawba, miyaad ka caqli badan tahay curriga iyo islaanta! Ha is cajabin, dhal yahay yari! Allihii ku abuuray ugu mahadnaq deeqda lagu siiyey! Miyaanad iman guri dugsoon, oo helin cid aad wax ka baran karto! Waxaad tahay dhataqle! Mana

dhaqan wanaagsanid. Runtu waa sidaas. Way kaa yar nixinaysaa, dantaaduse iyaday ku jirtaa. Saaxiibada dhabta ah, ayuun baana sidaa wax kuugu sheega. Dhegayso markale: ukun dhal, reen ama giir iska kici.

»Waxaan filayaa, inaan dunidayda ballaadhan iska xuli doono!« ayuu yidhi shinbirbadeedkii yaraa.

»Irriddu way kuu furan tahay!« ayey ugu jawaabtay digaagaddii.

Dabadeedna wuu tegay shinbirbadeedkii yaraa: wuxuu dul sabbeeyey oo quusay biyihii, hase yeeshee xawayaankii oo dhan baa ku yasay foolxumadiisii.

Hadda xilligii jiilaalka ayaa bilaabmay. Caleentii dhirta oo hurdi iyo maarriin ah, ayaa dabayli hawada ciyaarsiisay. Samadii qabow baa ka soo furmay, oo daruuro culus, ufo iyo baraf ayaa cirka xidhay. Tukihii oo laan fuushan baa qadhqadhyo darteed ku dhiillaamay: »Waaq! Waaq!« Xaaladda shinbirbadeedkii yaraa ee miskiinka ahaana, ma fiicna.

Haddaba galab baa goor cadceeddu sii dhacaysay, koox shinbiro waawayn ah oo qurux badani, dhirta ka soo dhex baxeen. Shinbirbadeedka yari weligii ma arkin dar quruxdaas leh. Waxay ahaayeen shinbiro xoog u cadcad, luqun dheer oo jalaqsanna leh. Waxay ahaayeen xuurbadeed. Jibaad yaab leh baana ka baxayey, markay babbiyaan baalashooda waawayn ee dhaadheer. Dhulka qabow ayey ka guureen, una hayaameen xagga dalalka diirran iyo haraha aan fadhiyin! Samada ayey isku shareereen, oo way sii cirbax-een. Dareen kulul baa galay shinbirbadeedkii yaraa, oo sida shaagga ayuu isugu wareegay biyaha dhexdoodii, markaasuu kor u kala bixiyey



luquntiisa, isagoo higsanaya shinbirahaas. Si yaab leh, oo makii danbe qudhiisa cabsi gelisay, ayuu xoog ugu jibaaday! Ma illaawi karo shinbirahaa quruxda badan; shinbirahaa ayaanka leh. Markay libdheenna, ilaa gunta ayuu quusay. Haddana kor buu u soo baxay, isagoo sidii wax maqan ah. Magaca shinbirahaas iyo halkay ku socdeen, midna muu garanayn, hase yeeshee wuxuu u jeclaaday si aanu weligii cid hore u jeclaan. Waxba ma xaasidin, waayo marna haabka kuma hayn, inuu yeesho qurux sidaas ah. Waxaa isaga u darnayd keliya oo farxad gelin lahayd, in shinbirbadeeddu oggolaato- miskiinka yar ee fooshaxun.

Jiilaalkii wuu qaboobaaday, oo haddana sii qaboobaaday. Waxay noqotay in shinbirbadeedkii yaraa marar badan biyaha ku dabbaasho, si aanu u barafoobin. Hasyeeshee habeen walba way soo yaraanayeen, intu kaga dabbaalan karo biyaha, ee aan barafoobini. Intay barafoobeen, ayey haddana burbureen lakabyadii barafku. Shinbirbadeedka yarina marwalba cagaha ayuu la dhacayey, si aanay biyuhu u fadhiisan. Ugu danbaystiina wuu itaal gabay, oo far riixi kari waayey, ilaa uu barafoobay oo dhagax noqday.

Hiirtii buu beerwale kallahayey arkay shinbirbadeedkii yaraa. Intu dul yimi buu barafkii kaga burburiyey qaraafiicuhu illanaa, oo geeyey gurigiisii, una dhiibay afadiisii. Dabadeed naftii baa ku soo noqotay shinbirbadeedkii yaraa.

Carruurtii baa doontay inay la ciyaaraan, hase yeeshee shinbirbadeedkii yaraa wuxuu mooday, inay dilayaan. Markaasuu duulay, isagoo baqanaya, oo ku dul dhacay hadhuubkii caanaha, dabadeed qolkii oo dhan baa wada caano noqday. Afadii baa qaylisay

oo cidla' haahaabatay. Markaasuu haddana duulay oo ku dul dhacay xeedhadii subagga, oo haddana duulay oo ku dhacay foostogobaladii daqiiqda, oo haddana ka duulay. Bal malee, sidee buu hadda u ekaaday! Afadii baa qaylisay oo la dabo carartay birqaab. Carruurtiina, iyagoo raba inay qabtaan shinbirbadeedka yar, ayey is wada jiidheen, way qoslayeen oo way qaylinayeen! Nasiib wanaag, albaabkii baa furnaa uu ka baxay. Dabadeed wuxuu dhex galay kayntii, oo baraf cusubi ku da'ay. Halkaas ayuuna jiifsday, isagoo sidii wax laamadoodsan ah.

Sheekada laga dhammaan maayo, haddii laga wada warramo jabka iyo hoogga uu soo mutay jiilaalkaas daran. Shinbirbadeedka yari, isagoo haradii aalaha dhexdiisa jiifa, ayey qorraxdii dib u kululaatay, oo ciday yaryaradii. Waxana soo galay xilligii gu'ga. Marku hal mar babbiyey baalashiisii, ayey u dhufteen si ka xooggan sidii hore, oo laxaad kaga gooyeen dhulka. Isagoon weli saani wax u garanin, ayuu yimi beer wayn oo geedo tufaax ubaxaystay ahi ku yiilleen. Halkaas uu ka soo kankamayey udugga ubaxyada hibaaqa oo ku baxay laamaha dhaadheer ee cagaaran ee ku soo foorara laabatooyinka gacanka. Alla! Meeshu siday u wacnayd, gu'yaadduna uga muuqatay

Badhtamaha kayntii ka horraysay, ayey ka soo baxeen saddex xuurbadeed oo cadcad, xoogna u qurux badnaa. Intay baalasha ka bafbaf siiyeen, ayey qunyar biyaha dul sabbeeyeen. Shinbirbadeedkii yaraa wuu gartay xawayaankaas haybadda leh, markaasuu murugooday.

»Inaan xaggooda u duulo ayaan rabaa, shinbirahaas nasabada fiican! Iyaguna kaw ayey igaga siinayaan, waayo anigoo foolxumadan leh,

ayaan ku dhiirraday inaan u dhawaado! Hase yeeshee dan kama lihi! Inay iyagu i dilaan baa ka fiican in shinbirbadeeddu i cagagsato; ama digaaggu i rifo; ama inanta raacda digaaggu i laaddo; ama gabadanada jiilaalkuba i qallajiso!« Dabadeed biyihii buu galay, oo u dabbaashay dhinicii xuurbadeedda qurxoon. Markay arkeen, ayey degdeg xaggiisii ugu xeeleen, iyagoo baalasha babbinaya. »I dila uun!« ayuu yidhi xawayaankii miskiinka ahaa, intu qoorta dhigtay oo biyaha hoos u eegay, isagoo sugaya wedkiisii. Hase yeeshee muxuu ku dhex arkay biyihii muraayadda ahaa? Wuxuu arkay sawirkiisii. Ma ahayn shinbir itaal daran oo dhuxul madow ah, iyo mid foolxun oo faqatiir ah. Wuxuu ahaa xuurbadeed aan biyo is marin.


Waxba kuma jabna in lagu dhasho beerta shinbirbadeedda, kol haddii ukuntu tahay mid xuurbadeed.


Farxad aan la qiyaasi karin baa saaqday shinbirbadeedkii yaraa, wax kastuu hore jab iyo hoog u soo marayba. Imminka wuxuu ka fikirayey keliya ayaankiisa wacan, iyo sidu ugu raaxaysan lahaa quruxda ku xeeran ee salaantay. Xuurbadeeddii waawaynaydna, intay afka ugu salaaxeen baalasha, ayey hareerihiisa dabbaasheen.

Waxaa beertii yimi carruur yaryar, oo roodhi iyo hadhuudh ku tuuray biyihii. Markaasuu qayliyey kii ugu yaraa: »Alla! Waa mid cusub!« Carruurtii kalena way la wadaageen riyaaqii: »Alla! Mid cusub baa yimi!« Way sacabo tumeen oo xarrigeen. Markaasay u carareen xaggii aabbahood iyo hooyadood, si ay ugu yeedhaan. Mar kale ayey biyihii ku tuureen roodhi iyo keeg. Idilkoodna waxay isla wada qireen: »Kan cusub baa ugu qurux badan! Aad buu u yar yahay,

xoogna wuu u qurux badan yahay!« Xuurbadeeddii gabawdayna way u sujuudeen.

Shinbirbadeedkii yaraa xoog buu u sheexay, oo madaxiisii buu ku hoos qariyey baalasha. Wuxuu yeelo, garan maayo! Farxad buu cirka marayey, hase yeeshee qab ma gelin, waayo cid qalbi fiican marna ma galo qab! Wuxuu ka fikiray, sidii awel hore loo caydhsaday ee loo yasay, iyo wuxuu hadda maqlayo ee cid waliba qirayso, inuu ugu qurux daban yahay shinbiraha bilicda san. Ubixii hibaaqa, ee ku baxay laamaha foorara, ayaa caarada hore la soo galay biyaha. Qorrax macaan oo diirran baa dul joogtay, iyadoon caad saarnayn. Markaasuu kala bixiyey baalashiisii, oo buuray luquntiisii caatada ahayd. Qalbigiisiina farxad baa dhaamisay: »marna hoodo intan le'eg kuma aan riyoon, markaan ahaa shinbirbadeedka fooshaxun!«





# Amiiraddii ku Seexatay Iniinta

Beri waxaa jiray amiir guurdoon ah, oo rabay inuu guursado keliya amiirad dhab ah. Dabadeed wuxuu maray dunida oo dhan, si uu u helo amiiraddaas, hase yeeshee meel walba wuu ku soo hungoobay. Amiirado badan baa jiray, wuxuuse si buuxda u ogaan kari waayey, inay yihiin amiirado dhab ah. Marwalbana wuxuu arkayey dhaliil uu ku saluugo. Dabadeed wuxuu dib ugu soo laabtay dalkiisii, isagoo xoog u niyad jabsan. Waayo wuxuu aad u doonayey inuu helo amiirad dhalad ah.

Haddaba habeen hawadu aad u xumayd, cirkuna isku daray hillaac iyo onkod, oo roob cabsi badani da'ay, ayuu qof tumay irriddii magaalada. Markaasuu kacay, oo ka furay boqorkii gaboobay.

Qofkii irridda tumay, waxay ahayd amiirad. Eebbowse, sidee roobka iyo cimiladii xumayd u galeen! Biyo ayaa ka da'ayey timaheeda iyo maryaheeda, oo intay sanka ka dareeraan ku shubmayey kabaheeda, cidhbaheedana ka daadanayey. Dabadeed waxay u sheegtay, inay tahay amiirad dhalad ah.

»Waa hagaag, inaad tahay amiirad dhab ah, waannu hubsan doonnaa« ayaa ku soo dhacday boqoradii gabawday, hase yeeshee waxba afka kamay odhan. Dabadeed intay gashay qolkii hurdada, ayey ka wada qaadday gogoshii dul saarnayd sariirta. Markaasay badhtankii sariirta dul dhigtay iniin digireed. Ka dibna labaatan furaash ayey dusha ka saartay iniintii, haddana labaatan xalleef ayey dusha ka sii saartay furaashyadii.

Halkaas ayey amiiraddii jiifsatay habeenkaas.

Subaxnimadii ayey waydiiyeen, inay si fiican u seexatay.

»Ha sheegin!« ayey tidhi amiiraddii, »giddi xalay oo dhan, marna indhaha isku maan qaban! Wax Alle ogaa ayaa gogosha hoos yiil? Wax adag baan ku dul jiifay. Jidhkaygii waa wada baro madow iyo haaro! Waana laga didayaa!«

Sidaas ayeyna ku ogaadeen inay tahay amiirad dhab ah, ka dib markay damaqday iniintii yarayd ee hoos tiil labaatanka furaash iyo labaatanka xalleef. Amiirad dhalad ah mooyee, cid kale sidaas uma jidh nugla.

Dabadeed amiirkii baa guursaday, oo ay noqotay ooridiisii. Waayo wuxuu hubsaday inay tahay amiirad dhab ah. Iniintiina waxaa la dhigay rugdhaqameedkii boqortooyada, halkaasoo weli lagu arki karo, haddaan cidi ka qaadin.

Bal eeg, sheekadu dhab ayey ahayde.



# Qarafka

Askari ayaa waddada gaardi ku soo maray- kow, laba! Kow, laba! Wuxuu dhabarka ku sitay shandaddiisii, seeftiisiina dhinaca ayey u sudhnayd, waayo dagaalka ayuu ku jiray, immikana reerkii ayuu qabanayaa.Wuxuu waddada kula kulmay habar faaliso ah oo gabawga foolxumo u dheer tahay, taasoo dacaydeedu ilaa naasaha laalaaday. »Fiid wanaagsan, askari yahaw!« ayey tidhi, »alla maxay seeftaadu wacan tahay, shandaddaaduna wayn tahay. Askari run ah ayaad tahay, waxaanad helaysaa lacag, in alla intaad rabto!«

»Aad baad u mahadsan tahay, duqdaadan faalisada ahi!« ayuu yidhi askarigii

»Eeg geedkaa wayn!« Faalisadii baa tilmaantay geed agtooda ahaa, »dhuux ma laha geedku oo dhexda wuu ka daloolaa, fuul baarkiisa, markaa waxaad arkaysaa god ku yaal halka ugu sarraysa, oo ku gaynaya ilaa iyo guntiisa hoose. Xadhig dheer baan dhexda kaaga xidhayaa,  si markaad ii dhawaaqdo aan dibadda kuugu soo jiido!«

»Oo maxaan ka qabanayaa geedka guntiisa?«, ayuu waydiiyey askarigii.

»Lacag baad soo guraysaa!« ayey tidhi faalisadii, » i maqal aniga, markaad gaadho geedka guntiisa waxaad arki doontaa barxad wayn. Aad ayey meeshu u iftiimaysaa, waayo waxaa  ka daaran boqol tiriig. Iftiinkoodu wuxuu ku tusayaa saddex albaab. Albaab kasta waxaa ka taagan furihiisa,  oo waad wada furi kartaa. Haddaad gasho qolka koowaad waxaad badhtankiisa ku arkaysaa saxaarad wayn, dusheeda waxaa ku fadhiya ey indhihiisu le'eg yihiin koobka shaaha,

hase yeeshee waxba ha ka werwerin! Waxaan ku siinayaa mara-dhawrtayda baraha leh, intaad ku fidiso dhulka ayaad eyga soo qaadaysaa, oo dhigaysaa mara-dhawrta dusheeda, ka bacdina fur saxaaradda oo soo guro lacag intaad rabto. Dhammaan lacagtani waa maar; hase yeeshee haddaad doorbidayso lacag silfar ah waxaad u gudbaysaa qolka ku xiga; hase yeeshee waxaa fadhiya ey indhihiisu le'eg yihiin shaagga marawaxadda; hase yeeshee ha ka baqan, intaad soo qaaddo uun baad dul dhigeysaa maradayda, ka dibna lacagtaad guranaysaa. Haddaad rabto dahab, waad heli kartaa isagana in alla intaad doonto, markaad gasho qolka saddexaad. Hase yeeshee eyga ku fadhiya saxaaradda dahabka ah indhihiisu waxay le'eg yihiin qalcadda wareegsan ee Kobanheegan. Waa inaad aamintaa inuu ey run ah yahay. Waxbase ha ka biqin. Isagana dul dhig mara-dhawrtayda, markaa waxba ku yeeli maayo. Markaa kiishka ka soo buuxso intaad dahab doontid.

»Waa arrin aad u fudud!« ayuu yidhi askarigii, »adigana maxaa kuugu jira, kolley wuxuun baad iga rabtaaye faaliso!«

»Shilin qudh ah kaama rabo! Keliya waxaad ii soo qaadaa qarafka duqdii ayeyday ku soo illawday berigii hore ee ay iyadu godka gashay!«

»Haddaa i sii aan xadhiga dhexda ku xidhee!« ayuu yidhi askarigii.

»Hoo!« ayey tidhi faalisadii, »tanna waa mara-dhawrtaydii buluugga ahayd«

Markaasuu intuu geedkii fantay, godkiina galay oo isku sii daayay hoggii waynaa ee boqolka tiriig ka shidnaayeen, siday faalisadu sheegtay. Markiiba wuxuu furay albaabkii ugu soo horreeyay. Alla

hayaay! Mise waxaa halkaa ka soo eegaya ey indhihiisu le'eg yihiin koobka shaaha.

»Wiil wanaagsan baad tahay!« ayuu yidhi askarigii, intuu dul dhigay maradii faalisada oo gurtay waxay lacag maar ah u qaadi karayeen jeebabkiisu. Saxaaradii ayuu xidhay, eygiina dul dhigay, oo u gudbay qolkii labaad. Tii horeba ka daran! Waxaa halkaa fadhiyay ey indhihiisu le'eg yihiin shaagga marawaxadda.

»Waxba sidaa ha ii soo eegin!« ayuu yidhi askarigii, »indhahaaga waad u daran tahay.« Dabadeed intuu qaaday eygii ayuu dul dhigay maradii habarta. Markuu arkay lacagta silfarta ah ee saxaaradda ka buuxda, ayuu qubay wixii maar uu sitay, oo ka buuxshay jeebabkiisii iyo shandadiiba silfar keliya. Ka dibna wuxuu u gudbay qolkii saddexaad. Alla! muuqaalkani naxdin waynaa! Eygan indhihiisu waxay le'ekaayeen qalcadda wareegsan! Markuu kaga galalac siiyana waxay u wareegayeen sida shaagga.

»Fiid wanaagsan!« ayuu yidhi askarigii, intuu sidii askarta u salaamay, waayo weligii ma arkin eygan oo kale. Hase yeeshee mar-labaadkii uu jalleecay ayuu naftiisa ku yidhi »Sidani si maaha!« Markaas intuu eygii dhuftay ayuu dhigay dhulkii oo furay saxaaraddii. Yaabka yaabkii! Alla muxuu meesha dahabku tuullaa! Kobenheegan oo dhan buu ku gadan karayey.  Abkay roodhiilaha dunida oo dhan ayuu keeg- doofaarka, keeg-askariga, shaabuugga iyo fardaha darandoorriya ka jimladan karayey. Lacagtu ilaa xad ayey u badnayd. Immikana wax alla wixii uu slacag silfar ah soo gurtay ayuu qubay oo ka buuxshay dahab jeebabkiisii, shandaddiisii, koofiyaddii iyo kabihii dhaadheeraaba, intay qaadi karayeen! Lacag intuu u baahnaa wuu

haystaa! Eygii buu dul dhigay saxaaradii, oo ka dhex qayliyey geedkii:
»Faalisooy! Iga soo saar!«
»Qarafkii ma siddaa?« ayey weydiisey habartii.
»Alla hayaay!« ayuu yidhi askarigii, »maskaxdaydaba wuu ka baxay,« markaasuu dib u noqday oo soo qaaday. Habartii markay soo jiiddayna wuxuu is arkay isagoo wadadii taagan oo ay jeebabka, kabaha, shandadda iyo koofiyaddaba uga buuxdo lacagi.
»Maxaad ku faleysaa qarafkan?« ayuu weydiiyey askarigii.
»Waxba kaama gelin!« ayey tidhi faalisadii, »sow lacag maad helin, i sii qarafka!«
»Gebgeb!« ayuu yidhi askarigii, »dhakhso ma iigu sheegaysaa waxaad ku samaynayso, mise intaan seefteyda la soo baxo ayaan qoorta kaa jaraa!«
»Maya!« ayey tidhi saaxiraddii.
Askarigiina qoorta ayuu ka jaray, oo sidaas ayey ku dhimatay! Askarigii intuu lacagtii ku xidhxidhay mara-dhawrteedii, oo sidii kiintaal dhabarka ku xambaaray, qarafkiina jeebka ku ritay, ayuu u kicitimay xaggii magaalada. Waxay ahayd magaalo aad u wanaagsan, hudheeladii ugu fiicnaa intuu ka galay ayuu sarriirtii iyo cuntadii ugu fiicnaana ka dalbaday, waayo immika waa hodan mar hadduu lacag intaa le'eg haysto.
Baalashlihii kabaha u tirtirayey ayaa ka yaabay in aanay is lahayn ninkan lacagtiisa iyo kabihiisu . Taasi waxay ahayd intaanu iibsan kabo cusub. Maalintii ku xigtay ayuu soo gatay kabo uu ku socdo iyo dhar aad u qurux badan! Askarigii wuxuu noqday nin hubqaad fiican, dadkii magaaladu waxay uga sheekeeyeen ganacsiga

magaaladooda, boqorkooda iyo inantiisa quruxda badan.

»Sidee loo arki karaa?« ayuu weydiiyey askarigii.

»Lamaba arki karo!« ayey giddi wada yidhaahdeen, »waxay ku nooshahay qasri macdan ah , oo ay ku wareegsan yihiin derbiyo iyo qalcado badani! Cid aan boqorka ahayn oo u geli karta ama ka soo bixi kartaa ma jirto, waayo beri hore ayaa faal sheegay inuu guursan doono askari dable ah, taasna boqorku ma doonayo!«

»Gabadhaa waa inaan arkaa!« ayuu is yidhi askarigii, hase yeeshee siday taasi u suurto gelaysaa!

Hadda wuxuu ku noolaa raaxo, riwaayadaha ayuu tagi jiray, wuxuu tamashlayn jiray beerta boqorka, saboolkana lacag badan buu ku sadaqaysan jiray, taasoo ahayd wax lagu amaani karo, waayo wuxuu xusuusnaa rafaadkii uu soo maray intaanu lacagta helin! Hadda wuxuu ahaa hodan, lebbis fiican, oo saaxiibbo badanna wuu yeeshay, giddigoodna waxay ku tilmaameen inuu yahay nin wanaagsan iyo

halyey ah, taasina askarigii aad ayey u cajabisay. Hase yeeshee lacag bixintiisii joogtada ahayd iyo iyadoo aanay waxba soo gelayn awgeed, ayuu ugu danbaystii is arkay isagoo haysta laba shilin oo keliya, markaa waxaa qasab ku noqotay inuu ka guuro qolalkii qaaliga ahaa ee uu deggenaa, una guuro qol aad u yar oo ku yiil dabaqa ugu sarreeya, saqafka hoostiisa, iyo inuu kabihiisa baalashaysto laftiisu, kuna dhufto qodobbo. Saaxiibadii nin qudhi kama soo booqan, waayo qolkuu deggenaa ayaa jaranjarradiisu dheerayd.

Haddaba habeen gudcur magangooyo ah, oo uu iibsan kari waayey xabbad shamac ah oo uu shito, ayuu xusuustey inay in yar oo xaydh ahi ku jirtay qarafkii uu ka soo saaray geedkii ay saaxiraddu ku

dhaadhicisay. Wuxuu la soo baxay qarafkii iyo xaydhii la shidayey, hase yeeshee markuu qarafkii shiday ee ay isliskii dhimbiilo ka duuleen, ayaa albaab furmay, mise waxaa ka soo booday eygii indhihiisu le'ekaayeen koobka shaaha, ee uu ku soo arkay geedka guntiisa , oo intuu hortiisa is taagay yidhi: »Maxaan kuu qabtaa, taliye!«

»Wax maxay ah!« ayuu askarigii yidhi, »waaba qaraf cajiib ah, oo aan waxaan doono ku helayo! Lacag ii keen!« ayuu ku yidhi eygii, kaasoo isla markiiba wif intuu libdhay, haddana wif soo noqday, isagoo kiish lacag ah afka ku sida.

Hadda wuxuu ogaaday qiimaha uu leeyahay qarafkani. Hadduu hal mar daaro waxaa u soo baxaya eygii ku fadhiyey saxaaradda maarta ah, laba goor hadduu daaro waxaa u soo baxaya eygii ku fadhiyey

saxaaradda silfarta ah, haddiise uu daaro saddex goor waxaa u soo baxaya eygii dahabka hayey. Immika dib ayuu ugu guurey qolalkii wanaagsanaa, lebbistey dharkii fiicnaa, saaxiibadiina way u wada yimaaddeen oo wada jeclaadeen.

Markaa wuxuu ka fikiray sababta inanta boqorka loo arki kari waayey, waxaasi waa sheekabaralay! Dadka oo dhammi wuxuu sheegayaa inay qurux badan tahay hase yeeshee maxay taraysaa quruxdu mar hadday weligeed dhex fadhiyeyso qasriga macdanta ah ee qalcadaha badan - ma sidaas ayaanan waligey u arkayn? - Aaway qarafkaygii! Markaasuu shiday hal mar, Wif waxaaba yimi eygii indhaha koobka le'eg lahaa.

»Immika waa saq dhexe!« ayuu yidhi askarigii,«hase yeeshee waxaan si wayn u rabaa inaan arko inanta boqorka, xitaa in yarna ha noqotee!«

Eygii markiiba albaabka ayuu ka baxay, intaanu askarigii libiqsan ayaa wuxuu arkay eygii oo sida inantii boqorka, iyadoo fadhiga ku hurudda eyga dhabarkiisa oo aad quruxda yaabto, shakina aanu ku jirin inay iyadii tahay; askarigii sinaba faraha uga ma laaban karayn, waxaana qasab ku noqotay inuu dhunkado, waayo askari dhab ah ayuu ahaa.

Eygii wuu celiyey inantii boqorka, lakiin markii waagu beryey, ee boqorkii iyo boqoradii ay shaaha cabbayeen, ayey inantii boqorku ka sheekaysay riyadii xalayto ee yaabka lahayd, kuna saabsanayd eyga iyo askariga. Inay fuushay eyga dhbarkiisa askariguna dhunkaday.

»Waa sheeko cajiib ah!« ayey boqoraddii tidhi.

Markaasaa loo xilsaaray habar ka mid ah shaqalaha boqortooyada, inay habeenkii isha ku hayso si loo kala hubsado inay riyo ahayd iyo inay wax kale ahayd.

Askarigii wuxuu xoog ugu boholyoobay inuu markale arko inantii boqorka, waxaa markaas u yimi eygii oo soo qaaday inantii, intii awooddiisu ahaydna la soo orday, hase yeeshee habartii oo gashan kabaha roobka ayaa qudheedu daba ordaysay, taasoo markay aragtay gurigii weynaa ee ay galeen, is tidhi wallaahi waad garatay xaggay qabteen, markaasay intay tabaashiir qaadday, iskutallaab wayn ku xarriiqday albaabka. Intay gurigii qabatay ayey iska jiifsatay. Eygiina wuu soo celiyey inantii boqorka, hase yeeshee markuu arkay in albaabkii guriga askariga isku-tallaab lagu calaamadiyey ayuu isna intuu tabaashiir qaatay albaabadii magaalada oo dhan isku-tallaab ku wada calaamadiyey.

Subaxnimadii ayaa boqorkii, boqoraddii, habartii shaqaalaha ahayd



iyo saraakiiliba isa soo raaceen si ay u arkaan halkay inanta boqorku ku dhaxday!

»Waa kan!« ayuu yidhi boqorkii, markuu arkay albaabkii ugu horreeyey ee tabaashiir lahaa.

»Maya, Waa kan macaanow!« ayey tidhi boqoraddii oo aragtay albaab kale oo iskutallaab leh.

»Halkaana mid baa ah, halkaana mid baa ah!« ayey giddigood yidhaahdeen, xag kastoo ay eegaanna iskutallaab ayaa ku tiil. Sidaana wax laguma heli karin.

Hase yeeshee boqoraddu waxay ahayd marwo ka caqli badnayd, inay gaadhi faras uun saarraato. Waxay la soo baxday maqaskeedii dahabka ahaa, oo jartey maro yar oo xariir ah,  oo ka toshay kiish yar oo ay ka buuxisay daqiiq, dabadeed waxay dhabarka kaga gunnudday inantii



boqorka, markaasey daloolisay kiishkii si daqiiqdu raad ugu reebto jidka guriga la geeyo inanta boqorka.

Habeenimadii waxaa soo noqday eygii, oo tunka u ritay inantii boqorka, oo u la carary askarigii sida wayn u rabay inuu la xidido reer boqor, oo ay noqoto ooridiisii.

Eygii waxba ma dareemin intaa daqiiqdu daadanaysay, laga soo bilaabo qasriga ilaa iyo daaqadda askariga, ee uu inanta boqorka kala galay. Subaxnimadii waxay boqorka iyo boqoraddu si cad u ogaadeen halka lala aaday inantoodii. Dabadeed inta la qabtay askarigii, ayaa xabsiga loo taxaabay.

Halkaasuu ku jiray. Alla maxaa mugdi iyo dacdarro tiil, iyadoo ay sidaa tahay ayey hadana u sheegeen in berrito la deldelayo. War lagu farxo ma ahayn, waayo qarafkiisii wuxuu ku soo illaaway halkii uu deggenaa. Subaxnimadii ayuu shabaggii daaqadda yar ka arkay dadkii magaalada oo dhakhso u socda, si ay u daawadaan marka la deldelayo. Wuxuu maqlay durbaankii iyo askartii oo gaardiyeysa. Dadkii ordayey wuxuu ku dhex arkay wiil yar oo kabatola ah, oo xidhan maro-dhawr harag ah iyo dacas, oo siduu u guclaynayey dacaskii midi kaga luntay daaqaddii askarigu ku xidhnaa hoosteeda.

»Waryaa, Ina kaboolow! Waxaad ku degdegtaa ma jiro!« ayuu yidhi askarigii, »waxba hagaagi maayaan ila iyo intaan soo baxayo, balse intaad oroddo, tag halkaan deggenaa, oo ii soo qaad qarafka yaal, waxaan ku siinayaa afar shilin e! Waa inaad cagaha wax ka daydo!« Kaboolihii yaraa wuu u baahnaa afarta shilin, wuxuu sii orod iyo soo orod ku keenay qarafkii, oo siiyey askarigii, hadda ayey sheeko cusubi bilaabantay.

Magaalada dibaddeeda waxaa laga sameeyey qool, ciidan iyo kumanyaal qof oo kale ku wareegsan yihiin. Boqorkii iyo boqoraddii waxay ku fadhiyeen carshigooda wayn, oo toos uga soo horjeeday xaakinka iyo guurtida

Askarigii waxaa markiiba la keeney meeshii, hase yeeshee markay damceen inay qoolka ku giijaan ayuu xusuusiyey in danbiile kasta loo ogolaado inuu hal wax oo aan danbi ahayn doorto, isaguna uu rabo inuu buuri cabbo, mar hadduu dunida maanta ka tegayo.

Boqorkuna maya kuma odhan karayn, markaasuu askarigii qarafkii shiday, kow, laba, saddex! Mise waxaa soo baxay eydii oo dhan. Kii indhaha koobka lahaa, kii indhaha shaagga marawaxadda lahaa, iyo kii lahaa indhaha qalcadda wareegasan ee Kobanheegan!

»I caawiya , si aan la ii deldelin!« ayuu yidhi askarigii, markaasay eydii xaakinkii iyo guurtidii qaar lugaha qabteen, qaarna sanka oo hawada u tuureen ilaa ay gobol-gobol u soo dhaceen.

»Ha yeelina sidaas!« ayuu ku qayliyey boqorkii, hase yeeshee eygii ugu weynaa ayaa intuu isagii iyo boqoraddiiba qaaday, ka daba tuuray kuwii kale. Askartii intay baqdeen, ayaa dadkii ku sayaxeen »Askariyahow,  boqor noo noqo, oo guurso inanta boqorka ee qur-uxda badan!«

Markaa waxay askarigii geliyeen gaadhi-faraskii boqorka, saddexdii eyna way hor galeen, iyagoo leh »GUUL!« carruurtiina iyagoo faraha ku fooryaya ayey askartii hor gaardiday. Inantii boqorkuna qasrigii macdanta ahaa ayey ka soo baxday, waxayna noqotay boqorad, taasina aad ayey u cajabisey! Arooskii wuxuu socday siddeed casho, eydiina miiska ayey la soo fadhiisteen oo indhaha ka galalac siiyeen.



# Cirsankayeedhka

Imbiradoorka Shiinuhu, sida laga yaabo inaad og tahay, waa nin Shiine ah. Dhammaan dadka ku xeeranina waa wada Shiine. Beri fog ayey sheekadani ka dhacday carriga Shiinaha, hase yeeshee sababtaas ayaaba ay ku mutaysatay in la dhegaysto, ka hor intaan la illaawin! Qasriga imbiraadoorku wuxuu ahaa dhismaha ugu cajiibsan dunida. Siduu u dhammaa waxaa laga sameeyey marmar qurux badan oo qaali ah, hase yeeshee xoog u jilicsan oo taabashada si wayn looga dhawro. Beerta qasriga waxaa ku yiil noocyada ugu bilicroon ubaxyada, kuwooda ugu sii qurux badanna waxaa ka lushay dawanno silfar ah oo sanqadhayey, si aan loo dhaafin iyagoon la dhaadin. Wax kastoo beerta imbiradoorka ku yiil, qorshe ayuu ku fadhiyey, xoogna way u baaxad waynayd oo xataa shaqaalaheedu ma aqoon ijaarkeeda. Marka in badan la socdana, waxaa loo gelayey kayn qurux wayn oo lahayd dhir dhaadheer iyo haro gun fog. Kayntu waxay xidhiidh sanayd ilaa badda buluugga ah oo gunteedu dheerayd. Maraakiib waawayn baana hoos maaxi karayey laamaha dhirtaas. Halkaasna waxaa ku noolaa cirsankayeedh, si macaan u heesi jiray. Kaasoo cid kale daayoo kalluumaystaha danyarta ahi, markuu habeenkii jillaabasho tago, intuu joogsado dhageysan jiray, isagoo hawlo kale sugayaan. »Alla! Cod macaanaa!« ayuu odhan jiray, hase yeeshee danta ayaa ku qasbi jirtay inuu illaawo heesta cirsankayeedhka oo shaqo tago. Habeenka xiga markuu maqlana, sidii oo kale ayuu haddana odhan jiray: »Alla! Cod macaanaa!«

Haddaba socoto ka kala timi dalalka dunida oo dhan baa soo

gaadhay caasimaddii imbiradoorka. Markaasay la dhaceen magaaladii, qasrigii iyo beertii. Hase yeeshee markay maqleen codkii cirsankayeedka waxay isku wada raaceen: »Kan ayaa ugu wada wanaagsan!«

Socotadii baa ka sheekaysay cirsankayeedhkii, markay ku laabteen dalalkoodii; cilmi doonkiina buugaag ayey ka qoreen magaaladii, qasrigii iyo beertii, hase yeeshee may illaawin cirsankayeedhkii, oo isaga ayey mudnaantii kowaad siiyeen. Kuwii halabuur awoodi karayeyna, suugaan qiimo badan ayey u tiriyeen cirsankayeedhkii ku noolaa kaynta badda gashan.

Buugaggaasi dunida oo dhan ayey ka dhaceen, qaarkoodna imbiradoorkii ayey soo galeen. Markaasuu ku fadhiistay kursigiisii dahabka ahaa, oo akhriyey kuna noqnoqday. Ilbidhiqsi kastana madaxa ayuu ruxayey, waayo wuu u bogsanaa tilmaamaha fiican ee laga sheegay magaaladiisa, qasrigiisa iyo beertiisa. »Hase yeeshee cirsankayeedhka ayaa ugu wada wanaagsan!« ayaa ku soo baxday.

»Waa maxay?« ayuu yidhi imbiradoorkii, »Cirsankayeedhka! Waxba kama ogi habayaraatee! Ma shinbir sidan ah baa ka tirsan imbiradooriyaddayda, oo weliba beertayda jooga! Weligay maan maqlin! Isagoo kale, ma in buug la akhriyaa!«

Dabadeed wuxuu u yeedhay guddoomiyihii qusuusida, oo ahaa nin aad u qab wayn, oo haddii cid ka derejo hoosaysaa ku dhiirrato la hadalkiisa ama wax waydiisana, aan ugu jawaabi jirin waxaan ahayn »Buus!«, taasoo aan micno lahayn.

»Waxaa halkan lagu sheegay shinbir qiimo badan, oo la yidhaahdo cirsankayeedh!« ayuu yidhi imbiradoorkii, »waxaa lagu tilmaamay,

inuu ugu wanaagsan yahay imbiradooriyaddayda wayn! Maxaa hore la iigu sheegi waayey shinbirkaas!«

»Weligay hore u maan maqlin magacaas« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »shinbirkaas marna cidi ma soo gaadhsiin qusuusida.«

»Waxaan rabaa in isla caawa halkan uu yimaaddo, oo shinbirkaasi ii heeso!« ayuu yidhi imbiradoorkii, »oo dunidii kaloo dhan baaba imbiradooriyaddayda iiga xogogaalsane!«

»Weligay hore u maan maqlin magacaas« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »waa inaan raadiyo, waa inaan soo helo!«

Hase yeeshee xaggee baa laga helayaa? Giddi jaranjarrooyinkii buu kor iyo hoos u orday guddoomiyihii qusuusidu, oo isaga gudbay qolalkii iyo marindhexaadyadii. Hase yeeshee dadku la kulmay, ma jirin cid wax ka maqashay cirsankayeedhka. Dabadeed guddoomiyihii qusuusidu dib buu haddana ugu cararay xaggii imbiradoorka. Wuxuu u sheegey inay tahay sheekabaralay ay curiyeen kuwa buugaagta qoray. »Imbiradoorka waynow, ha rumeysan sheekabaralyda la qoray! Waa curisyo la allifay iyo waxa loo yaqaan fanka madow!«

»Hase yeeshee buuggan aan ka akhriyey!« ayuu yidhi imbiradoorkii, »waxaa ii soo diray imbiradoorka awoodda wayn ee Jabbaan, sidaa awgeed ma noqon karo been. Waxaan rabaa inaan dhegaysto cirsankayeedhka! Waa inuu halkan caawa yimaaddo! Si wayn baan u daryeelayaa! Hadduu iman waayo, markaa qusuusida oo dhan baa caloosha laga tumayaa, markay casheeyaan!«

»Tising-bi« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu. Markaasuu haddana, kor iyo hoos, dib ugu orday jaranjarrooyinkii, oo isaga gudbay qolalkii iyo marindhexaaddadii. Kala badh baa qusuusidii

daba ordaysay, waayo may rabin in cashada dabadeed caloosha laga tumo. Waxaa la goobayey shinbirkan cajiibka ah, ee dunida oo dhammi garanayso, qusuusiduna aanay waxba ka ogayn.

Ugu dambeyntii waxay kijinka kula kulmeen gabadh yar oo sabool ah, taasoo tidhi: »Alla, ma  Cirsankayeedhka! Si fiican baan u aqaan! Waa dhab, muxuu heesi yaqaan! Fiid kasta waxaa la i siiyaa in yar oo hambo ah, si aan ugu geeyo hooyaday oo bukta, miskiinaddu xeebta ayey deggan tahay. Anigoo daallan baan soo laabtaa, oo kaynta ku dhex nastaa. Markaas ayaan dhegaystaa cirsankayeedhka oo heesaya. Dabadeed ilmo ayaa indhahayga ku soo joogsata, waxaad mooddaa in hooyaday i dhunkatay!«

»Jaariyadda yarey!« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »shaqo rasmi ah baan kijinka kaa siinayaa, imbiradoorka oo cunteynaya waan daawadsiinayaa, haddaad noo gayso cirsankayeedhka oo isla caawa fiidka la rabo.«

Dabadeed giddigood waxay u dareereen xaggii kaynta, bartii cirsankayeedhku caadaystay inuu ka heeso. Kala badh baa qusuusidii meesha marayey; siday tubtii u hayeen baana sac ciyey.

»Hayaay!« buu yidhi lataliyihii, »hadda ayeynu haynaa! Maxaa awood ku jirta xawayaanka yar. Waan hubaa inaan hore u maqlay!«

»Maya, tani waa lo’ ciyeysa!« ayey tidhi jaariyaddii yarayd, »weli way durugsan tahay bartuu joogaa!«

Haddana rahii baa isaga jiibiyey harada.

»Fiicanaa!« ayuu yidhi wadaadkii qasriga shiinuhu, »haddaan maqlayaa, waa sida dawanno yaryar oo kiniisadeed!«

»Maya, waa rahii,« ayey tidhi jaariyadii yarayd, »waxayse

ila tahay inaynu mar dhow maqli doono!«

Markaasuu cirsankayeedhkii bilaabay hees.

»Waa kaas isagii!« ayey tidhi inantii yarayd, »dhegeysta, dhegaysta! Waa ka bartaas fadhiya!« waxay tilmaantay shinbir yar oo laan ku taagan, midabkiisuna dameeri yahay.

»Ma dhab baa!« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »weligay ma filayn inuu sidan u eg yahay! Waa doqoni ma garatay! Waa hubaal inuu midab doorsoomay, markuu arkay waxaa madax u timi!«

»Cirsankayeedhka yarow!« ayey kor ugu dhawaaqday jaariyadii yarayd, »imbiradoorkaygii naxariista badnaa, ayaa xoog u raba inaad u heesto!«

»Farxad wayn ayey ii tahay!« ayuu yidhi cirsankayeedhkii, oo wuxuu u heesay si laga helay.

»Waxaad mooddaa dawanno quraarad ah!« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »bal eeg sidu dhuunta yar leeyahay! Waa wax lala yaabo, maxaynu weligeen hore ugu maqli weynay. Guul wayn buu u noqon doonaa qusuusida!«

»Mar kalena ma u heesaa imbaradoorka!« ayuu yidhi cirsankayeedhkii, sidii imbaradoorku meesha joogay.

»Cirsankayeedhka yar ee wacanow!« ayuu yidhi guddoomiyihii qusuusidu, »waxaa farxad wayn ii ah, inaan kugu casuumo xafladda qusuusida ee caawa, halkaas oo heestan debecsan aad ku soo jiidan doonto imbiradoorka haybadda leh!«

»Heestaydu waxay ku soo bixi lahayd kaynta cagaaran dhexdeeda!« ayuu yidhi Cirsankayeedhkii, hase yeeshee iskii buu u raacay, markuu ogaaday in imbaradoorku sidaas codsaday.



Qasrigii si fiican baa loo dhalaaliyey! Marmarkii gidaarada iyo dhulkana, waxaa iftiimiyey kumanaan nal oo dahabi ah! Noocyada ugu fiican ubaxyada, oo la sudhay dawanno saani u sanqadhaya, ayaa la qotomiyey marindhexaadka. Waa la sii socday oo la soo socday, dawannaduna mar ayey wada dhawaaqayeen, ilaa la is maqli waayey.

Badhtamaha qolka weyn ee xafladaha, oo imbiraadoorku fadhiyey, ayaa la qotomiyey laan dahab ah, oo cirsankayeedhkii isku taagay. Waxaa madasha joogay giddi qusuusidii imbaradoorka. Inantii yarayd ee kijinkana waxaa loo oggolaaday inay albaabka daba joogsato, iyadoo hadda loo magacaabay kuugad rasmi ah. Giddigood waxay u soo lebbisteen sidii ugu fiicnayd., qof walibana wuxuu daawanyey shinbirkan yar ee dameeriga ah, ee imbiradoorkii u khushuucay.

Cirsankayeedhkii si macaan buu u heesay, ilaa ilmo ka timi indhihii imbiradoorka, oo dhabannada ka dareertay. Markaasuu haddana si ka sii fiican, oo qalbiga ruxday, u heesay cirsankayeedhkii. Imbiradoorkii xoog buu uga helay, waxanu amar ku bixiyey, in dacaskiisa dahabiga ah qoorta loo geliyo cirsankayeedhka. Hase yeeshee wuu u mahadnaqay oo ka cudurdaartay, waayo abaalgud ku filan oo hore ayuu tirsanayey.

»Ilmo ayaan ku arkay indhaha imbiradoorka!« ayuu yidhi, »ma jirto wax taa ka qiimo badan! Ilmada imbiradoorku waa qaali! Alleba og, sida fiican ee laygu abaalguday!« markaasuu haddana ku luqeeyey codkiisii macaanaa ee barakaysnaa.

»Waa cawayskii ugu xiiso badnaa, inta aannu garanayno!« ayey yidhaahdeen dumarkii madasha joogay, oo afka ayey biyo ku qaateen, si ay uga qadhqadh siiyaan, marka cidi la hadasho, waxayna

canjilayeen cirsankayeedhka. Xataa shaqaalihii hoose iyo jaariyadihii qolalka gogli jiray ayaa qudhoodu caawa mafsuud ah, taasoo ahayd arrin wayn, waayo wax iyaga ka farxiyaaba ma jirin. Sidaas ayaana cirsankayeedhkii ugu wada tumay habeenkaas.

Hadda waa inuu qusuusida la dego, oo yeesho qafiskiisa; waa inuu maalintii iskii u tamashleeyo laba jeer, mar dharaartii ah iyo mar habeenkii ah. Waxaa loo sameeyey laba iyo toban adeege, oo mid waliba dacalka hayo maro dheer oo xariir ah oo lugta kaga xidhan shinbirka. Tamashlaha noocan ahna raaxo kuma jirin.

Giddi magaaladii baa ka sheekaysay shinbirka yaabka leh. Marka laba kulmaan, ka hore ma odhanayn waxaan ahayn »Cirsan-!« ka kalena »kayeedh!« eray kale kumay darayn, oo intaas ayey isku fahmayeen. Kow iyo toban carruurtii hiliblayaasha ah, ayaa loogu magac daray shinbirka, hase yeeshee midkoodna cod ma lahayn.

Haddaba maalin baa imbiradoorkii loo keenay kartoon wayn, oo dusha ay kaga tiil: Cirsankayeedh.

»Haddana waa buug kale oo ka hadlaya shinbirkeenna caanka ah!« ayuu yidhi imbaradoorkii, hase yeeshee buug kuma jirin. Waxaa loogu hoos tegay cirsankayeedh farshaxan ah oo ku jiray sanduuq yar, kaasoo u ekaa ka nool, laguna xardhay dheeman, rubbi iyo safiir. Marka la buuxiyo, wuxuu shinbirkan sanaaciga ahi qaadi karayey hees ka mid ah kuwii ka nooli qaadi jiray, isagoo dabada kor iyo hoos u lulaya, silfar iyo dahabna la widhwidhaya. Qoortiisana waxaa ka laalaaday maro yar oo ay ku qornayd: »Cirsankayeedhka imbiradoorka Jabbaanku waa sabool, marka loo eego cirsankayeedhka imbiradoorka Shiinaha.«

»Way ka dhacaysaa!« ayey giddi yidhaahdeen, qofkii shinbirka sanaaciga ah keenayna waxaa toos loogu magacaabay: guddoomiyaha cirsankayeedhka imbiradoorka wayn.

»Imminka wadajir ha u heeseen, oo ha noqdeen lammaane!«

Dabadeed wadajir ayey u heeseen, hase yeeshee way isla qabsan waayeen. Cirsankayeedhii runta ahaa, siduu rabay buu u heesay, shinbirkii sanaaciga ahaana sidii ku duubnayd. »Eed ma leh« ayuu yidhi macallinkii muusigu, »wuxuu raacayaa habdhac gaar ah oo anigu aan baray!« Dabadeed waxay noqotay inuu kelidii heeso cirsankayeedhkii sanaaciga ahaa - Sidii ka runta ah buu uga farxiyey, markaasaa weliba aragtidiisu indhaha uga roonayd: wuxuu u widhwidhayey sidii shuuli iyo biinka gaaddada.

Saddex iyo soddon jeer buu qaaday hees qudh ah oo isku midho ahayd, isagoon daalin. Dadku waxay rabeen inuu haddana markale ku soo celiyo, hase yeeshee imbaradoorkii ayey la noqotay, inuu hadda wax yar heeso cirsankayeedhka nooli — Hase yeeshee aawayba? Cidi ma dhaadin, inuu daaqadda furan ka baxay, oo ku laabtay kayntiisii cagaarnayd.

»Waa maxay sidaasi?« ayuu yidhi imbaradoorkii, qusuusidiina dhammaantood way caayeen cirsankayeedhkii runta ahaa, oo waxay ku tilmaameen xawayaanka ugu abaallaawaysan. »shinbirkii fiicnaa wuu inoo joogaa!« ayey yidhaahdeen , dabadeed waxay noqotay inuu haddana markale heeso shinbirkii sanaaciga ahaa. Waxay ahayd markii afar iyo soddonaad ee isla heestan ay dhegaystaan, welise dusha kamay wada qaban, waayo aad ayey u midho adkayd. Macallinkii muusiguna si xad dhaaf ah buu u ammaanay shinbirkii

sanaaciga ahaa, isagoo golaha ku qancinayey, in kani ka wanaagsan yahay cirsankayeedhka runta ah. Wanaaggiisu maaha keliya xagga lebbiska iyo waxaan oo dheeman bilic leh saaran, hase yeeshee wuu ka oboc fiican yahay.

»Dhammaan mudanayaasha sharafta leh, iyo imbiradoorka cid walba ka sarreeya, idinkuba waa aragtaan, inaan cirsankayeedhka runta ah lagu xisaabtami karin, wax ka iman doona! Hase yeeshee cirsankayeedhka sanaaciga ah, wax waliba waa sidii loogu talagalay! Sidaas ayey ahaanayaan; sidaasna iskama beddalayaan! Waa la hagaajin karaa, waa la kala furi karaa, dadkana waa la tusi karaa bartay geerarku ku jiraan, siday u wada shaqeeyaan, iyo sida midba ka kale u raacayo!«

»Sidaas ayey nala tahay!« ayey wada yidhaahdeen. Macallinkii muusigana waxaa loo oggolaaday, inuu axadda soo socota, dadwaynaha daawadsiiyo shinbirka. »Waa inay iyaguna maqlaan, isagoo heesaya!« ayuu yidhi imbaradoorkii. Dabadeed way dhegaysteen, oo uga heleen, siday qaxwe ku xaraarad baxeen, waana lagu yiqiin shiinaha sidaas, giddigoodna waxay yidhaahdeen »Allaah!« markaasay kor u taageen faraha loo yaqaan »murdisada,« oo haddana rukuuceen. Hase yeeshee kalluumaysatadii saboolka ahayd, ee dhegaysan jirtay codka cirsankayeedhka runta ahi, waxay yidhaahdeen: »habdhiciisu wuu fiican yahay, waanu metelaa kii runta ahaa, hase yeeshee waxbaa ka maqan, garan mayno wuxuu yahay!«

Cirsankayeedhkii runta ahaa, waa laga mustaafuriyey dalkii iyo imbiraadooriyaddiiba.

Shinbirkii sanaaciga ahaana waxaa barkimo xariir ah loo dhinac

dhigay sariirtii imbaradoorka. Dhammaan hadyaduhu helay, oo isugu jiray dahab iyo dhagxan macdan ahina, way hareero yiilleen. Xagga derejada wuu dallacay, oo waxaa loo magacaabay »heesaaga lediya imbiradoorka wayn!« kaas oo lahaa jagada kowaad ee dhinaca bidix. Dhinacaas, oo wadnuhu ku jiro, imbiradoorkuna si wayn u tixgelin jiray. Sida kuwa kale, ayaa wadnaha imbiradoorkuna dhinaca bidix ku jiray. Macallinkii muusiguna wuxuu shinbirkii sanaaciga ahaa ka qoray buug ka koobnaa shan iyo labaatan xidhmo. Wuxuu ahaa buug aad u xeeldheer oo xoog u faro badan, waxaana ka buuxay erayada ugu adag af shiinaha. Markaasaa dadkii wada yidhaahdeen waannu akhrinay, oo waannu fahamnay, illayn haddii kale waxay noqonayaan damiinno, oo caloosha ayaa laga tumayaa.



Sannad dhan baa sidaas ku dhammaaday. Imbiradoorkii, qusuusidii iyo shiinihii kalena dusha ayey ka wada qaybeen cod kastoo ku jiray heestii cirsankayeedhka sanaaciga ah. Hase yeeshee sababtaas oo qudh ah ayey hadda xoog ugu sii jeclaadeen; way la heesi karayeen qudhoodu, waanay la heeseenba. Dibjirkii baa ku heesay »sisisi! klukklukkluk!« imbiradoorkiina sidoo kale ayuu ku heesay! Waa dhab oo si rasmi ah ayey u fiicnayd.

Haddaba habeen baa, iyadoo shinbirkii sanaaciga ahaa si fiican u heesayo, imbaradoorkii oo sariirta ku jiifayna dhegaysanayo, wax ka dhex »Qac!« yidhaahdeen shinbirkii. Waslad baa baxday: »Wiriririg!« oo giddi geerarkii baa isku dhex yaacay, markaasuu joogsaday muusigii.

Imbaradoorkii baa toos uga soo booday sariirtii oo amar ku bixiyey in loo yeedho dhakhtarkiisii khaaska ahaa, hase yeeshee muxuu ka qaban karayey! Waxaa haddana la keenay saacadoole, kaasoo markuu wax badan waydiiyey, ee xoog u baadhay, wax ka qabtay shinbirkii. Hase yeeshee wuxuu yidhi, waa in xoog loo dhawro, waayo ilkihii geerarka ayaa lismay, suuragalna maaha in qaar cusub la geliyo, oo sidaas ayuu muusigu ku badbaadayaa. Xoog baa looga xumaaday! Sannadkiina hal mar baa lagu dhiirran jiray dhegaysiga shinbirkii sanaaciga ahaa, markaasoo weliba xoog ugu dhib badnaa. Hase yeeshee macallinkii muusiga oo jeediyey khudbad gaaban oo erayo culus, ayaa sheegay: inay sidii hore oo kale u fiican tahay, markaasay sumcaddeedii wanaagsanayd sidii hore u sii jirtay.

Hadda shan sannadood baa sidaas ku dhammaaday, giddi dalkiina waxaa saamaysay dhiillo xun, waayo laftiyo dhuuxa ayey ka wada jeclaayeen imbiradoorkooda, oo hadda u jiifa xanuun aanu ka kacayn,

sida la yidhi. Imbiradoor cusub baa la doortay, dadkiina jidadka ayuu tubanaa, iyagoo guddoomiyihii qusuusida waydiinayey xaaladda caafimaad ee imbiradoorka.

Isaguna, »Buus« intuu yidhaahdo ayuun buu madaxa ruxayey.

Isagoo qabow oo midab doorsamay buu imbiradoorkii dul yiil sariirtiisii waynayd ee cajiibka ahayd. Dhammaan qusuusidii waxay moodayeen inuu dhintay, mid kastaana wuxuu u orday tahniyaddii imbiradoorka cusub. Shaqaalihii hoose way dareereen si ay arrinta uga sheekaystaan, hablihii qasriguna waxay isugu yimaaddeen kulan qaxweed ballaadhan. Qolalkii  iyo marindhexaadyadii waa la wada goglay, si aan jaandhaw loo maqlin, sidaas awgeed goobtu jabaq ma lahayn, oo waxay ahayd juuqla' jaaqla'. Hase yeeshee imbiradoorkii weli ma dhiman. Isagoo tawafay oo midab doorsamay buu dul yiil sariirtiisii ballaadhnayd, ee daahyada dhaadheer ee demiska ah iyo guntimaha culus ee dahab ahi, ku soo laalaadeen. Daaqad furan baa kor ku tiil, taasoo iftiinka dayaxu uga soo galayey imbiradoorka iyo shinbirka sanaaciga ah.

Sidii wax culusi laabta ka saaran yihiin, buu dirqi iyo tu daran ku neefsanayey imbiradoorkaas miskiinka ahi. Indhihii baa kor u telligmay, markaasuu arkay in waxaa laabta ka saarani tahay geeridii oo xidhatay taashkiisii dahabka ahaa, iyadoo gacan ku sidata seeftiisii dahabka ahayd, gacanta kalena calankiisii waynaa. Laababka daahyadii demiska ahaana, waxaa ka soo jeeday madaxyo cajiib ah, oo isugu jiray qaar xoog u foolxun iyo qaar barakaysan oo roon: waa dhammaan falalkii xumaa iyo kuwii suubbanaa ee imbiradoorku sameeyey, oo hadda daawanayey markay geeridii laabta ka fuushay.

»Waxan ma xusuusan tahay?« ayey mid mid dhegta ugu saareen, »waxan ma xusuusan tahay!« oo wax fara badan ayey u sheegeen, markaasuu wejiga dhidid ka soo booday.

»Waxan weligay ma arkin!« ayuu yidh imbiradoorkii, »muusig, muusig, tuma durbaankii waynaa ee shiinaha!« ayuu ku qayliyey, »si aanan u maqlin, waxan ay dhurayaan!«

Sidii ayey wixii ugu dhurayeen, geeridiina sida Shiinaha ayey madaxa u ruxday, wax kastoo la yidhaahdo.

»Muusig, muusig!« ayuu ku qayliyey imbiradoorkii, »kor u hees, oo hees! Shinbirka yar ee barakaysan ee dahabka ahaw! Waxaan ku siiyey dahab iyo waxyaabo qaali ah, gacantayda ayaan kuugu geliyey dacaskaygii dahabiga ahaa, ee kor u hees oo hees!« hase yeeshee shinbirkii ma digigixan; ma joogin cid buuxisaa, sidaa awgeedna ma heesi karayn. Dabadeed geeridii baa imbiradoorkii ku gubtay indhaheedii xordanaa, ee ka soo jeeday daloollada waawayn, goobtuna shib ayey ahayd, oo si argagax leh ayey u aamusnayd.

Markaasaa si lama filaan ah, meel daaqadda u dhow looga qaaday hees aanay jirin mid ka wanaagsani: Wuxuu ahaa cirsankayeedhkii yaraa ee runta ahaa, oo ku taagnaa laan debedda ku tiil. Wuxuu maqlay xanuunka imbiradoorka, wuxuuna ugu yimi si uu ugu qaado heeso illawsiiya xumadda oo yididiilo geliya. Markastuu sii wado heestana wejiyadii baa sii baaba’ayey, dhiiggiina dib buu u dhex xalliyey xididadii dhintay ee imbiradoorka, oo wuu ka soo reeyey. Geerida qudheedii baa dhegaysatay heestii oo tidhi: »Wad cirsankayeedhyaw yari! Wad heesta!«

»Waa hagaag, ee ma ii dhiibaysaa seeftaas wayn ee dahabka

ah, calankaas hodanka ah, iyo taashka imbiradoorka!«

Geeridii, qalabkaas qaaliga ah, mid kasta hees ayey dhaafsatay. Cirsankayeedhkiina wuu sii waday heestii, oo wuxuu ka heesay xabaalaha aamusan, barta ubaxyada cadcadi ka baxaan, halka manka geeduhu ka carfo, halkaasoo ilmada ehelada nooli waraabiso cawska ugbaadka ah. Markaasay geeridii xiisaysay xabaalaheedii oo laydha raacday. Sidii ceeryaan cad oo qabow, ayeyna daaqadda uga baxday.

»Mahadsanid, mahadsanid!« ayuu yidhi imbiradoorkii, »Shinbirkan yar ee cirka laga soo dirow, si fiican baan kuu garanayaa! Waan kaa mustaafuriyey dalka iyo imbiradooriyaddaydaba! Imminkana heestaadii baa didisay sharkii sariirtayda ku giblanaa, iyo geeridii wadnahayga gilgishay! Maxaan kuugu abaalgudaa?«

»Waad ii abaalguday!« ayuu yidhi cirsankayeedhkii, »indhahaaga ayaan kaga ilmaysiiyey, markii kowaad aan kuu heesay! Taas weligay ma illaawayo! Murriyadaha farxad geliya qalbiga heesaaguna, waa iyada! Haddana seexo, aad bogsatid, oo aad tamaraysatide! Aniguna waan kuu heesayaa!«

Dabadeed wuu heesay. Imbiradoorkiina si macaan buu u gamay, waxaana uu seexday hurdo caafimaad oo fiican.

Iftiinka qorraxda ayaa uga soo galay daaqadda, markuu toosay imbiraadoorkii, isagoo bogsaday oo tamaraystay. Welina shaqaalihiisii cidi kuma soo laaban, waayo waxay moodayeen inuu dhintay. Hase yeeshee cirsankayeedhkii weli laantii buu ka heesayey.

»Marwalba waa inaad ila joogto!« ayuu yidhi imbiradoorkii, »waa inaad heesto keliya, markaad adigu doonto. Shinbirkan sanaaciga ahna, kun meelood baan u kala jebinayaa.«

»Sidaas ha yeelin!« ayuu yidhi cirsankayeedhkii, »intii awooddisu ahayd si fiican buu u shaqeeyey! Iska hayso weligaa! Anigu halkan kama dhisan karo buul, qasrigana kuma noolaan karo, hase yeeshee ii oggolow, inaan imaaddo markaan doono. Intaan fiidkii isku taago laantan daaqadda agteeda, ayaan kuu heesi doonaa, ilaa aad mafsuuddo oo niyaddu kuu hagaagto. Waxaan ka heesi doonaa xaaladaha kuwa ladan, iyo kuwa liita! Waxaan ka heesi doonaa xumaha iyo samaha qarsoon ee kugu xeeran! Shinbirkan yar ee heesaa wuxuu duulaa dhul fog oo ku siman halkay deggan yihiin kalluumaysatada saboolka ah, korna ugu siman guryaha beeralayda, iyo meel kastoo ka durugsan adiga iyo qusuusidaada! Qalbigaaga ayaan uga kalgacal badnahay taashkaaga, inkastoo taashkuba barakaysan yahay! Waan imanayaa, oo waan kuu heesayaa! hase yeeshee hal wax iigu ballabqaad!«

»Waxaad doonto qabso!« ayuu yidhi imbiradoorkii, isagoo ku taagan dirayskii imbiradoornimada, oo kelidii uu gashaday, islamarkaana wadnaha dul saaray seeftiisii, dahabku ka cuslaa.

»Hal arrin baan kaa codsanayaa! Waa in aanad cid u sheegin, inaad leedahay shinbir yar oo wax walba kaaga warrama! Sidaas ayey wax waliba ku sii hagaagayaan e!«

Markaasuu duulay cirsankayeedhkii.

Dabadeed shaqaalihii baa soo galay si ay u eegaan imbiradoorkoodii dhintay, hase yeeshee anfariir ayey la qallaleen, markuu ku yidhi: »subax wanaagsan!«

# Waa hubaal!

»Waa sheeko argagax leh!« ayey tidhi digaagadi. Waxayna tilmaantay meel ka tirsan magaalada, aanse ahayn bartay ka dhacday sheekadu. »Waa sheeko argagax leh oo ka dhacday xeradigaagta! Caawa keliday ma seexan karo! Way fiican tahay, innagoo badan inaynu raarta joogno!« Dabadeed waxay uga sheekaysay wixii dhacay, ilaa baalashii digaagadaha kale sare joogsadeen, dhoorkii diigguna hoos u dhacay. Waa sheeko la hubo oo dhacday!

Hase yeeshee aynu bilawga ka soo qaadno sheekadan, oo ka dhacday xeradigaag ku tiil dhinaca kale ee magaalada.

Qorraxdii baa dhacday, digaagadihiina kor ayey u baxeen. Mid ka mid ah baa lahayd baal cad iyo lugo gaaban. Caadi ayey u dhali jirtay ukunta. Si walbana waxay u ahayd digaagad maamuus leh. Markay kor u soo baxday, ayey bilawday inay afka iskaga gurto qashinkii soo raacay baalasheeda. Dabadeed waxaa ka dhacay baal yar.



»Waa kaa go’ay!« ayey tidhi, »shaki kuma jiro, markaan baal iska rifaba, inaan sii qurux badnaanayo!« kaftan ayey u tidhi, waanay ugu kaftan badnayd digaagadaha,

inkastoo sidaynu hore u sheegnay xoog loo maamuusi jiray. Dabadeedna way iska seexatay.


Gabbalkii baa madoobaaday. Digaagadihiina, iyagoo dhinaca isku wada haya ayey seexdeen. Hase yeeshee tii ugu xigtay digaagaddii baalka caddi ka go'ay ma seexan. Wax ayey maqashay, waxayse iska dhigtay midaan waxba maqlin - sidaasoo la yeelo, marka la rabo in rebshad la'aan ifka la joogo. Hase yeeshee digaagaddii dhinaca kale ka xigtay, ayey noqotay inay u sheegto: »Waxaa la yidhi, ma maqashay? Cid magacaabi maayo. Waxase jirta digaagad baalasha isaga rifaysa, si ay u qurux badnaato! Haddaan diig ahaan lahaa, waan kaba qashaafi lahaa.«

Digaagadaha dushooda qumman waxaa fadhiyey qoys guumays ah oo ka koobnaa: hooyo, aabbo iyo dhashoodii. Waxay ahaayeen qoys dhego fudud. Eray kastoo digaagadaha deriskoodu yidhaahdeenna, way maqleen. Markaasay indhaha ka bidhbidh siiyeen. Hooyadiina, iyadu baalasha ayey isku babbisay: »Ha dhegaysanina! Inkastaan filayo inaad wada maqasheen waxa la yidhi! Aniguba labadayda dhegood baan ku maqlay. Ka hor intaan la dhego cuslaaninna, wax badan baa lagu maqlaa! Mid digaagadaha ka mid ah, ayaa gebi ahaan anshaxii hilmaantay, oo diigga awgii isaga wada riftay baalasha!«

»Maaha waxan oo kale, in la maqashiiyo carruurta!« ayuu yidhi aabbihii.

»Waxaan rabaa inaan arrintan u soo sheego guumaysta deggan jidka tallawgiisa!« Waa guumaysta hadda ugu xishmad badan« ayey tidhi hooyadii, markaasay duushay.

»U-u! uu!« ayey labadii guumaysood ku ciyeen, iygoo wargelinayey



qoollaydii deganayd buulasha jidka tallawgiisa. »Ma maqasheen! Ma maqasheen! U-uu! Digaagad baa baalashii isaga wada riftay diigga awgii! Qadhqadhyo ayaa kaga kaw siin doonta, haddaanay mar horeba dhiman!«

»Halkee? Halkee?« ayey ku madiixday qoollaydii.

»Beerta ku taal jidka tallawgiisa! Aniga laftayda ayaa si fiican u arkay! Waa sheeko aan mudnayn in la sii wadwado! Hase yeeshee waa hubaal oo way dhacday!«

»Waa run, eray kastoo la yidhi!« ayey tidhi qoollaydii, waxayna u dareertay dhinacii daaradda digaagga, iyadoo ku madiixaysa: »waxaa jirta digaagad, qaarkood baa lahaa waxaa jira laba digaagadood, oo giddi baalashii isaga rifay si ay uga duwanaadaan kuwa kale, iyo si ay u soo jiitaan diigga. Waa khamaar halis ah, intay hargabaan ayey kaar u dhiman doonaan, haatanna labadiiba dhinte!«


»Toosa! Toosa!« ayuu ku eedaamay diiggii, intuu daaradda dusheedii u baxay. Weli hurdo ayaa indhaha ka sii saarnayd, hase yeeshee wuxuu ku eedaamay: »Waxaa jira saddex digaagadood oo jeclaaday diig, una geeriyooday jacaylkaas! Waxay iska wada rifeen baalashii! Waa sheeko argagax leh, hase yeeshee anigu ma xejin karo, idinkuna meel walba ka rida!«

»Meel walba ka rida!« ayey fiidmeertii ku baflaysay, digaagadihiina ku quqleeyeen, oo diiggiina ku eedaamay: »Meel walba ka rida! Meel walba ka rida!« Dabadeed sheekadii baa hadba xeradigaag uga gudubtay xeradigaag kale, ugu danbaystiina waxay ku soo laabatay bartay ka bilaabantay. »Waxaa jira shan digaagadood« ayey ku soo gaadhay, »oo iska wada rifay baalashii, si ay ugu muujiyaan, diigga oo

ay jeclaadeen, tooda ugu dhuuban, dabadeed waxay iska wada rifeen baalashii, jeeray dhiig iskaga yaaciyeen oo dhinteen. Maxaa sheex iyo murugo gaadhay reerahoodii! Ciddii lahaydna, maxaa khasaare ku dhacay!«

Digaagaddii uu ka go'ay baalkii yaraa ee lushay, markii danbe may garan in sheekadu iyada khusayso. Iyadoo ahayd digaagad xoog loo tixgeliyo awgeedna, waxay tidhi: »Waan ka xumahay waxa gaadhay digaagadahaas! Hase yeeshee wax badan oo sidan ah baa dhaca! Sheekadan oo kalena maaha in la denbebeso, aniguna waxaan awooddayda saarayaa inay ku soo baxdo wargaysyada, si dalkoo dhan ay u wada gaadho. Sidaas ayeyna mutaysteen digaagadahaas iyo reerahooduba.«

Dabadeed wargaysyadii ayey u gaysay oo daabacay sheekadii, kana sii dhigay hubaal: baal yar baana runtii noqon kara shan digaagadood!



HANS CHRISTIAN ANDERSEN 2005
WWW.HCA2005.COM
THE KINGDOM OF DENMARK
THE BIKUBEN FOUNDATION

DET KGL BIBLIOTEK

ISBN 87-723-582-1